Det här verket har digitaliserats vid Göteborgs universitetsbibliotek.
Alla tryckta texter är OCR-tolkade till maskinläsbar text. Det betyder att du kan söka och kopiera texten från dokumentet. Vissa äldre dokument med dåligt tryck kan vara svåra att OCR-tolka korrekt vilket medför att den OCR-tolkade texten kan innehålla fel och därför bör man visuellt jämföra med verkets bilder för att avgöra vad som är riktigt.

This work has been digitised at Gothenburg University Library.
All printed texts have been OCR-processed and converted to machine readable text.
This means that you can search and copy text from the document. Some early printed books are hard to OCR-process correctly and the text may contain errors, so one should always visually compare it with the images to determine what is correct.

GÖTEBORGS UNIVERSITET

# HAJ-OSAMAD-EH

N.M.P. PRINT, CAIRO.

GÖTEBORGS · UNIVERSITETS · BIBLIOTEK ·
Humanistiska
biblioteket
22/
1437




KI-INJIL-KABARAYA GESTI UTUSAYA
' Ma nurkas arkeysa âd uifaya ? '

# HAJ-OIRKU-EH (gharko)

"A HEAVEN'S PILGRIMAGE"

An attempt to render (so far as may be) in Somali the First Part of Bunyan's "Pilgrim's Progress."

Nile Mission Press, Cairo.

GÖTEBORGS UNIVERSITETS BIBLIOTEK
GÖTEBORGS
UNIVERSITETSBIBLIOTEK

## HAJ-OIRKU-EH (gharko)

(sidi riyodo dahdedha ekantis wa lamujinaya)

Iminki an soonayey mel ogelgeleh, wahan duniadan, wa galey mel boghon eh wa jifsadey, inan hurudo ban rabey hurdo dahdedha wa riyodey. Riyadaidha ilali! ban arkey nin maria âd ohun bughobey. Mel bu jogsadey aghalkis dushisa owaregey, kitab gaanta kuhaistey, ghalab weyn garbaha bu fuley. Wan ilaliey, wa arkey kitabki ofureyo oakhrineyo dahdis. Hadis akhriey ishis biya bihiney, ohin oileh asbilabey, isseli weyyey, wa shegey :—Ilkaiga! Senyela! Halkan wa kunoghodey gurigis, owahi askarey wa isseliey in nagtis iyo ilmihis ilkis wah sokasi weyyan. Ilowse wah yer asjogey wah amusi weyyey; sababti dibkis wa badsadey. Akhirtanka ba hadalki owahi ghulbigis kujirey nagtis iyo ilmihis hortodha wafurey, warrankan wabilabey :—Nagtaigi ti jelada iyo ilmihi neftaiga aniga wadegini way ki jelatan âd an odib way, waha sababtis ghalabki an wadaya oisskuusladaya, wana laishegey hadal orun ah, in beledkaini kan walagugubayo dabki oirka kaimanaya. Wa dimahayna anunki odan aniga neftaiga iyo adiga nagtaiga iyo idinka ilmahaiga owankujeelada, hadi jid oinnukuararno olanafakinayo maleh; jidna sidanah weli maan aghan. Way nahen haskis gorti aymaghlen, sababti owarrankis wa aminen maaha, ilowse inu jiro madah hanun. Bes way oawadi waudowata wa helen neberko inu assehedo, waha umalayen—hadi assehedo madah hanun wakufaisinaya. Ilowse awadi kolkey lagarey ruhis wa âd wayyey sidi malinti; inu ba sehedo bedelkis waoiyey ishis biya kabahen. Subihi wa warsaden :—Sei tahai? Wahas yiri :—Halkaiga kasidaraya; warran sidi horte wa bilabey; nahariskodha wabahey. Wa umalayen inay jirohis warran kakan odireh kagubihinayan. Kolkol bay ukughosolen kolkol wauhurufen kolkol âdudafen keligis. Isaga ba bilabey aghalki dah-

dis okharsadey, iyaga sababtodha wa tukadey, unaharisadey, waissarkey eli waha sababtis halkis oďibeh. Wakuweregey bêr keligis ohaddo wa akhriey gor kaleh wa tukey; sidi asyeley in beri ďamantodha.

Berigo, sidi ban arkey, obêr bu kuweregeyey kitabkis bu akhriey ghulbigis wauďibtamey osidi imin kaleh ointi akhrio âd asuoyey, sidi horte marki ba asuoyey, wahasyiri:—Sên yelo in leifakinayo? Haddana ban arkey ointi iyo inti uilalineyey. Waha sidi nin inu kaararo wa doneyey. Ilowse wa jogey; wahan sidi ban arkey sababtis jidki kabahayo ma kasin. Wan ilaliyey wa arkey ninko magais Ki-Injilka-baraya; wa uďowadey wa warsadey:—Mahad oyneysa? Waujawabey:—Ader! kitabkan gaantaigi ankuhaista wahan dahdis ban arkey in leigeriyo inan ďimanayo, oďimad ba dambedis leihukuminayo; aniga wa arkey ghulbigaiga inan ďinto ma rabin, inan leihukmino ma karin. Ki-Injilkabaraya wahas yiri:-Maha u ďimasho ma rabto, oamrigan wihi ohunah sidi badan waghoba. Ninkas wa jawabey:—Waabsina ghalabkan dushi ofula uleiskis khabrigi waitimbinaya iyo kahos, Nartina oweliged ban dai dona; Hadina, Ader, geresadi an katago ban diyar maihi, hukunki an tago diyar maihi hukunkina baadigis ladilo; wahan omalyashodha inan oiyo wa yeley. Ki-Injilka-baraya baushegey:—Hadi sidas halkaga yahai, mahad ujogta? Wakujawabey:— Sababtis ma ogho jidki oiron an marayo. Kas ba hansho usiyey hadal kan eh "karor adabti oimanaya". Ninki hansho uakhriey, ishi Ki-Injilka-baraya ukutâgey wahasyiri:—Inten araraya? Ki-Injilka-baraya farti utâgey ogestis bêr oballareh katalabey; wahasyiri:—Albabkas makuarkeysa? Ninkas wahasyiri:—Maya! Ki-Injilkabaraya wahasyiri: Ma nurki arkeysa âd uifaya? Ninkas wahasyiri:—Umalaya oban arkey. Ki-Injilkabar.:—Nurkas âd uilali! Kas ba uteg! Sas albabkas ad

arkeysa ohadi ad-ugarata wahi adyeleyso walukushegaya. Riyodkaiga wahan kuarkey ninki arar bilabey. Weli way inti dher aghalkis kagarey, nagtis iyo ilmihis wakasayen in astegayo, wa ghailiyen, nogho! nogho! ayyirahden. Ilowse ninki degtis faro ugeliyey âd asararey wahasyiri :—Noloshi ! Noloshi ! Noloshi weligis! Bes way, ma ilalinin galashis ilowse wa ararey bananka dehdis wa jedey. Diriskisina wa bahen inay arkayan oararey ; orodkis ba dahdis gharkodha waughosolayen, gharkodha waubajinayen, gharkodha wa ghailiyen, wauyirahden .—Nogho ! Nogho ! Jamaadodha laba ghofod shaurkodha hog kunoghon, midko magais Kima-degaisanaya way ki kaleh Ki-lageddinaya. Gorti ba ninkas wa kaey, mel dher astegey. Ilowse labadan talododha :—An uraano ; dukso kabaadigis bay garen. Wahasyiri isaga:—Diriskaiga, mahad utimiden ? Wawarsaden :—Wahan unimid ghulbigaga angugelino ad lonoghotide. Wahasyiri :—Ad ma lakarayo ; idinka Beledki-Ki-hallowaya kufaditan omehas leiwadaley. Wan arkey orunah sas asyahai sidi magais wav ohadi dimanaysan mehas ghabrigi hostis mel kadegi dontan, gorto ama haddo, mel dab iyo kibrid leh. Diriskaiga yehey radki lahada in iraatan.

Ki-ma-degaisanaya wa warsadey : — Je ! warabta wadegahaina galal ankudafno, owihi ladnantainiah. Kristan (sas way magais) wajawabey : — Sas way sababti wahas damantis oidinka kadafi donta wah bu maaha issueg way oin yer wihi aniga rahaisan dona. Hadina idinka issiraatan, wasamirayan, wahi an helaya idinka wa heleysan; sababti meshas an tega waladerginaya onagabadanaya. Kaleya, warrankaiga runtis sheriba ! Ki-ma-degaisanaya wa warsadey :—Adiga mahad doneysa owihi dunia odan adudafeysa ? Kristan :—Wa dona dahal ma ashallawi dono, wa khushin malaha, weligis ma angego, wahasna irka lahaista, lusinaya nimankas âd-

uwadonayan, gorti laballamey, irku lajogta. Hadi idinka jeshihin akhri karta akhbartan kitabkaiga. Ki-madeg.:—Hadalkan wah bu maaha. Kitabkaga ha dumo! Ma adiga akhbaleysa in nolonoghoto ambo maaha? Kristan wayiri:—Ma noghonayo aniga sababti gaantaiga wa geliney "inan mahrath ufalo". Ki-ma-degaisanaya:—Kale, adiga diriskaiga Ki-lageddinaya, an noghono keligaini aghalka oisaga laanti! dad owahad way sidas odoghoneh wa kibirayan, okolke shaur ayghobtan ojeel yihin, neftodha aghli leh isskuarkayan kabadan todoba ghofod oshaurkodha fasiri karan. Kilageddinaya:—Ha naain! hadi wehelki Kristan wah run ah wa shega, wihi oisaga inu helo wadonaya kaini kafian yahai. Ghulbigaiga wa kajeel yahai diriskaiga an latago. Ki-ma-deg.:—Dabbalo kaleh mia? Akhbal shaurkaiga onogho. Ya yaghan mehi la kugeynayo ninkan wallan. Sinogho! sinogho! aghli yesho! Kristan :— Wadegaga solakukale, Ki-la-geddinaya yehey! Run way wihi jinsigodha kawarramey wa jirayan, okuwi kaleh obadan oamanah. Hadi an adiamininin kitabkan dahdis uakhri. Kitabkanna odan runtis Ki subiey dîgis dahdis lakagadabaiey. Ki-lagedd.:—Diriskaiga yehey Ki-ma-degaisanaya, aniga ba haddo ghulbigaiga wa adkanaya. Ninkan fareed ah ban larai dona. Halkaiga wahi eh usiga halkis ha ahado. Ilowse, wehelkaiga yehey, ma kaseysa jidki nageynayo mehas an rabna? Kristan:—Nin waishegey magais Ki-Injil-kabaraya dakhso an tego iriddi yer ohore ohaggas walanoshegaya jidki akhbartis. Ki-lagedd :—Sokale haddo jirankaiga fianah ankaano. Wa isslabahen labadodha; Ki-ma-deg.:—Aniga gurikaiga ban noghoda. Ma rabo wadegnimadodha kuwi sidi ogaradlaan ukhatalanayan. Wahi ankuriyodey wa arkey kolkey Ki-ma-degaisanaya ka dambe wa tegey Kristan iyo Ki-la-geddinaya inay bananki jidkis-

ayjogsaden isslahadlayen. Hadalkasna sas wa bilaben; Kristan :— Adiga, Ki-lageddinaya, diriskaiga, sê isskuarkeysa? Wan afrahadiga ba akhbashey inad isslaraato iyo aniga. Hadi Ki-ma-ḋegaisanaya arki laba wahi an arkey ghulbigi hog iyo absi leh oishi weli ma la arka dushis manosiyinin sidan dukhsieh. Ki-lagedd. :—Diriskaiga yehey, labadeni mehan isslajirna wahi adtiri akhbartis adisheg omehan an tagna oside lafarhinaya. Kristan :—Ghulbigaiga ka fian wakukasi kara arabkaiga wa shegi kara. Ilowse oad jeshey akhbarti kitabkaiga kuakhrinaya. Ki-lageddinaya :—Kitabkaga wahi kuyâl ma in shak maaha run ahado bad aminta? Kristan :—Waiyei, wa run way. Sababti Ki-bein-ma-yeli kara Isaga kitabkas bu subiney. Ki-lagedd. :—Warrankaga ron way, akhbartasna jinsigis mahu yahai? Kristan : — Haggas suldanimo weliged ukulafaḋi kara onolan weliged nolasi kara inaina weligeni faḋino suldanimadas hostedha. Ki-lagedd. :—Ron way, maha jira haḋdana? Kristan :—Tajyal way oamaneh nolasin karan iyo maroyal osidi ghorahdu oirka dahdis ḋalalsan noyelayan. Ki-lagedd. :—Wahan âdfareed way. Maha haḋdana? Kristan :—Weliba oin ama hazini ma jirayo, sababtis meshas Sayyidkedha isheni ilmoin oḋan wakatiraya. Ki-ladegg. : — Kuwina isskudarsameyna haggas mia? aragtodha side tahai? Kristan : — Waisskudarsameyna anunki iyo Maserafi iyo Makerubi; hadi keliged arkeyso un nurkodha sidi indolaan noghon lahaid. Haḋdana hagga maisskuarkeysan adiga iyo dad badan okun kun iyo toban gor kun kun onahormaren mehas aytagen; dad kas oḋan shughul hun ma subiyan ilowse kuwi jeelleh way kuwi ghudusleh oḋamantodha Ilahi ishis hortedha aysoonayan; jogsanayan Neftis hortis owahelen in loaghbalo weligodha. Halko warran

haggas wakuarkeyna dugheyda dubghoda ghoban odhahabeh. Haggas waarkeyna gebdihi oghuduseh vinanda ghoban odhahabeh. Haggas waarkeyna nimanki duniadan gebel gebel ugogoiyey iyo kuwi dab logubayey iyo kuwi hilibodha duwag odireh loûnayey iyo kuwi baddu lotimbinavey wa kas sababtis Sayyidki mehas sidi ujeeladen. Damantodha wa arki donna fian ujogan onolol weliged sidi maro loguntiyey. Ki-lagedd.:—Kan hadi lamaghley un ghulbigi jeel ubuki kara, Ilowse ma wahan owihi farahsan ah lahelaya? Side anunki oghaibsan karna? Sayyidki Suldanki dulkas isskisu udigey kitabkan dahdis wahan: warranki oisskuyal wahan way:—Hadi innaga ghulbigi odamantis warabno Isagu wanosiyi dona ib maleh.

Ki-lagedd.: — Wehelkaiga fian, aniga wahan inan maghley ban afrahey. Hayya! an bahno âddukso. Kristan:—Aniga sidi an raba kumasoon karo; wa sabab eh ghalabkan odushaiga fulaya uleiskis. Wahan arkey riyodaiga gorti ya hadalkan wa damaden mel odogho badan wa dowaden, wahas aha bananki dahdis; oiyaga osidi inda malehin sababtis, markiba meshi dogho eh aykudaen; owartu doghoeh maghaedha "Ti-damaa-kagoineysa". Haggan ya wah yer bay kugalagashen, khushin badan korkodha, ulashubiyey. Kristan ba sababti uleis ghalabkis wabilabey doghadi dahdis isskutimbanayey. Haddo Ki-la-geddinaya wahas yiri:— Jirankaiga Kristan yehey! Haddan inted gartey? Kristan wa warsadey:—Run way ma ogi. Neberko Ki-lageddinaya neebeh bilabey, diran wehelkis washegey:—Halki sida way mia kas oron ki tan iyo hore adishegtey? Had amarkan issnaghobten safarkaini bilowgis, mahan osas way arkeyna hore ban damah-aina? hadi dogho badan oraha an kaboho adiga keligaga olabadaini dulkas ofian adheleysa, oyelkaiga maaha. Wa âdhogsadey ama gorto ama labad wakabahey

doghad (or 'dohbad') warti barbarkedha aghalkis kudow aha waisskukaey. Kristan wamauarkin baadigis. Kristan ba mel "Ti-damaa-kagoineysa" odohbad dah-dedha wagadomeyey waladafey keligis; ilowse weli âd-issdaliyey inti warti barbartis aghalk kadher oalbabkas kadow ah. Wa dowan ugarey, ilowse wa kabahi weyey, osababti ghalabki uleiskis. Rihyodise ban arkey nin uyimid magais Ki-kalmanaya, wa warsadey: Mehan mahad ku subineysa?

Kristan wayiri:—Ader, waishegey ninko magais Ki-Injilka-baraya jidkan laghadi laha; waiviri:—Tag inti iriddas. Wahas ba inan adadi oimaneysa kagubaho. An-igana kolkey an sooneyey wartan ban kudaey. Ki-kalm.:—Mahadse ujiri weysey darajyalka? Kristan:—Absidi sidi diraadey oaniga jidki odowan ghadey, wartan kudaeyâ. Ki-kalm.: — Gaanti idib! Gaantis wadibey. Ki-kalmanaya dohbada wa kabihiyey, mel engegen udisey waamriey jidkis asghadayo. Aniga ba ninkas odoh-bada ukabihiyey wautalabey wairi:—Ader, mahu ojidki beledki Ki-hallawaya kabaha inti albabkas utegeya mehan dehmara—mahu ulasubin wai nimanki masafireh gan ateisanah inay aminah kabadan halka kutegaya? Wahu iyiri :— Wartan dohboeh jinsigedha lamasubin kara. Dad ghulbigis iminti neftis odembi-leh wagaraya uskagis iyo wah hun korkis imintas kujiraya wahan gor walba haggan kasodegaya. Sababtas magaedha wanoghodey wartan "Ti-damaa-kagoineysa". Mana-hedha ki dembi leh iminti hurdadi odembileh waloke-iyey halkis oladumiya wa kaseya, gor walba ghulbigis dahdis korkaayan wihi badan absileh owiswisleh iyo afkar ruhan ah; wihi ba damantodha kulan usotegayan mehan ujirayan. Sababtasna mehan sidi hun way.

Suldan ba loajibin maaha mehan sidi ohun wajira. Haddana shagiohis omuhandisyodis amrihodha lokutosa sanado kabadan lehyo-toban-bogholkan, tan iyo haddan meshan dulkis shughul walokughobaya oshow lakukabi laha: run ban shega owa oghahai haggan lakulighey ama labaton-kun ama kabadan gawadi olabuhey okun-kun ba barnin wanaksan ah wakti walba mel walba Suldanku suldanimadis leh (wahan sidi kuwi shegi karan wa lehayan ugubadan watari kara hadi meshan dahdedha dul fian lakusubi dono) hadi subin fian ah malaha show ukari laha; ilowse mehi warti Ti-damaakagoineysa weli wajirta, sidanna wa jireysa tan iyo dambeh wah odan okari kara wa kusubinen.

Run ba yahai in darajyal fian otâgan ah amrigi KI-khanun-hukumodis udigey dahdis walasarey warti dahdedha kulasarey; ilowse gor omehan uskagedha âdbadan hunkhaaya sidi gorti wanoghoda odabail lakageddina darajyalkan wah yer weli walaarka; ama hadi walaarko madah wareirki sababtis niman ges kutalabadan okorkodha maaha imintasna dohbod dahdedha ayan adag lokughobsada, odarajyashi weli kujiravan; ilowse jidki dulkis adeg way tan iyo dambeh albabki dahdis wa garen. Ruhyodaiga ban arkey oKi-lageddinaya haddan gurigis wakunoghadey. Diriskis wautegen wafirinayen. Dad gharkis wahay yirahden :— Inad so noghotey sifian ad yeshey; dadki kaleh yirahden: Wahad doghon noghotey, neftadha wahad gelisey mel khatareh adiga iyo Kristan. Dad kaleh ughosoley sababti absidis, wahay yirahden :— Aniga hadan sidi adiga marki hore kudôfado, maikaadkaden wihi yerah oshughuleh: Ki-geddinaya ba iyaga dahdodha lafadisey ofuleh. Gadashise ghulbigis wah kabadan bu heley; kolkasna iyaga odan hadalododha wa bedelen Kristan weli isaga jiwab ma eli karey dushis udedelayen. Khabarki Ki- lageddinaya sas way.

Keligis kolkey safreyey Kristan wah dher kuarkey ninko berohi jidki Kristan sojedey waisskuimaden labad jid dahdodha. Ninki magais Ki-duniadan-higmadedha-leh, wahu fadiyey beled magais Duniadan Shaurkedha, beled weyn, udowi aha beledki Kristan kabahey. Kolkeyna isskulaney iyo Kristan owah yer bu kasey inu kan way; (Sababti khabarkis wa batey Beledki-Ki-Hallowaya sidas ukadafey beledkis okujirayey keliah dahdis maaha haddanase in mel kaleh dahdodha.) Sababtas Ki-duniadan-higmadedha-leh wah wa kasey osidi soodkis wa taab ah sidi hinrageyey otakeyey; namnadan wah lahadleyey oyiri :—Warya! wadeygi fian, inted ukaada ghalab nemnahan oulus ah kuwarereysa. Kristan :— Run way; hadi gorto noghodey nin oghalab uwarerey, wa umalaya aniga sas okaleh, wahasna oiwarsatey : Inted ukaada? Wan kakeeya, Ader, albabkas oyer hortaiga, sababti waleihadley haggas jidki oghalabkaiga ouleis ah inan kadafi kara ikulatosaya. Ki-duniadan-higmadedha-leh :— Ma nag iyo aror wa ghobta? Kristan :— Ha! (nag iyo aror) ban ughoba, Ilowse uleiskan sidi waikharibeya, maan ujeelo karo sidi hore. Umalaya inan noghodey sidi hadanan ughobin. Ki-h-d-l.; Maimaghaleyso hadi shaurkaiga kushego? Kristan :— Shaurkaga hadi fian yahai wa maghlaya, sababti shaur ki fian dan ban ulehahai. Ki-h-d-l. :— Shaurkaiga sas way : Ugudukso uyel ghalabkaga adkudigto, sababti tan iyo intan sa ahado ghulbigaga weli fadisan mayo oweli ma kafarahaiso karta wihi ofian ah o-Ilahi kugukarimey hadiyo inted ghalabkaga kadigto. Kristan :— Wahan an dona inan digo ghalabkaiga, ilowse keligaiga ma digi karo, dulkainina ma jiro ninko gharabkaigi kaghadi kara; kas way sababti ojidkan wa ghada, sidi kushegtey, in ikalaghado ghalabkaiga. Ki-d-h-l. :— Ya kudirey jidkan ghalabkaga in lakukghado? Kristan :— Ninko owahan arkey inu sidi nin weyn aha, ohishmad weyn bu lehaha, magais way " Ki-Injilka-

baraya " . Ki-d-h-l. :— Ninkas âdkuashtakaynaya owahu kugusiyey shaurkan. Duniada dahdedha majirojid kaleh jidkan oskugudirey kabadan khatareh otaabeh, Adigana wahas ukaseysa hadi shaurkis adraato. Wan arkey midko owah hun gorti bad kuluntey. Sabab wartas magaaedha Ti-damaa-kagoinevsa doh-bodedha ban arkey olakugumariney. Ilowse taabki wartas wa hor lehyahai taabyal ukuhelayan kuwi jidkan soodkis ubadinayan. Aniga imaghal ; adiga aniga dâ kaweyn ban lehahai. Jidkan dahdis hadad raato sas wa heleysa :— wakudaleysa, wakuhanuneysa, wakubahaneysa, mel khatar adgeleysa iyo khawanan, sef bad arkeysa iyo libaho iyo abeyso iyo mel mugdieh iyo dimasho iyo wah odan okudibaya. Sas run way ; odad badan yakashahida wahas. Mahu nin neftis isskadileya omarti hadalkis kufiriya ? Kristan :— Ader, ghalabka uleiskis korkeyga saran ahai k hun way wahad shegeysa odan. Sidi ban arka owah walba jidkan inoghonaya wah bu maaha hadan kaghadi karo uleiska ghalabkan. Ki-d-h-l. :— Ghalabkan gorti ohore mahai kunoghotey ? Kristan :— Kitabkan gaantaiga kujira oakhrinayey wahan dahdis way. Ki-d-h-l. :— Sas yan umalaynayey ; wahasna sidi odad kaleh ghabilo hun kuosoleynayan wakuhelan isskumid oadiga. Wahey wah aghligodha kaweyn wagelayan, markiba afkar owarersan leh wa noghonayan sidi okaleh adiga ; afkardasna wasubiyan bini Adan inay aghligodha walakaghadayan, haddana odahdodha dad kuheli donan wahba makasayan, jidid hallakah kadsila bey ararayan. Wahan ban kasa wa raba, ghalabkaiga ulusah inan digo. Ki-d-h-l. :— Mahadse raha addoneysa jidkan okhatar sidi obadan kuguraneysa ? Sas way ohadad isugto oaniga bad imaghasho ban kutusi kara inad wihi adrabto uhesho haithinan issarkin wihi oabsilch jidkan wakugelaneysa sidi kadsila. Run way odawadi halkaga dowan tal, haddana ban shega — bedelki akht_

artas wah badan nebadeh iyo wadeynima fian eh iyoghulbigaga salamaddis leh bad kuheleysa. Kristan :— Sirtan, Ader, ikalabihi. wankutuka. Ki-d-h-l. :—Beledkasdahdis omagais " Aslubeh " wahu fadiya nin billisah magais "Ki-Sharia âduhaia", nin higmad badan leh osîfadis âd fianta. Wahu âd yaghan inu garab kafuro dad ghalabkodha, ghalab kaga sas okaleh. Wa aghan sidan fayido badan wa keney. Haddana kuwi wah jirahayan aghligodha sababti ghalabkodha fian faiobi kara. Wahad karta inad isskutagto adigana haddo wakutarava. Aghalkis mel fog maaha wahu noghonaya meilko kelieh. Osagu hadu shô ma jogeyo wilko lehyahai barbar ofian magais " Adab " wav. Wan shegi kara inu shughulkan sidi abihis okaleh waogahado. Haggas ba karta ghalabkaga in kaghato; ohadan adrabin aghalkaga onoghsho, anigana ma jeeli inad haggas ukaato, wayeri karta nagtaga iyo anugyashaga ayimadan reskan sababti gudihis aghal makujiro dad oêbereh ijara badan anlahain iyo hunguri fian orakhîs lagahelaya. Haddana wahad fadinaysa adsifian haggas sababtis kuwi diriskaga fian lahayan owalakusubi laha dastur roneh iyo hishmad.

Gorti hadalkas wa maghley Kristan dib buarkeyey ; haddona sas neftis issushaurey :— Billiskan hadu run shegey fareed way shaurkis hadan rao- ; — wahasna bu yiri :—Hoi ! Abbo, itus gurigi ninkas ofian, anukee. Ki-d-h-l. :—Burtas ma arkeysa odherah ? Kristan :—Run ah, wa arkeya. Ki-d-h-l. :— Burtas agtedha lazim inad marto oaghalki hore wagareysa isaga lehyahai.

Kristan ba jidkis wa dafey aghalki Ki-Sharia-âduhaia inukaeyo ol-ogargarayo. Ilowse hadu wa garey burti dowantedha, wahu arkey sidi dher aha obarbarkas jidka kuhigey sidi kulaladey owahu kaabsadey hadi hor ukoo burti madahis korkis kadao ; bas waisstâgey wahu subiyo kasi waiyey.

Haďdana gortan ojidkis waďafey ghalabkis ulus kabadan arkey. Burta ba wakabiḫiyey dab iyo kibrid (terakh.) Wa fikirey Kristan in dab lugubinayo sababtan ďiďiď badan wakabiḫiyey wagarirey a̲bsi. Gortan ba bilabey inu kaganeḫey sababti Ki-d-ḫ-l. shaurkis wara̲ey ; haďdana kolkan wahu arkey Ki-Injilka-bareya kulan uso̲odey ; aragisna keliged waji ukaḫishoneyey. Ki-Injilkabareya ba gor walba wasoďowaneyey okolkey waimadey, waufiriyey kulul olagaa̲bsado uneḫey indibis sas way isskuballaney Kristan, washegey :— Warya ! Kristan, maḫad meshan kasubineysa ? Maḫa ujawabo kasi weiyey. Waisstâgey hadal maleh. Ki-I.-b. waushegey haďdana :— Adiga mianad ninkas anarkey oBeledki Ki Hallowaya gidarkis banankis ooiyey ? Maḫad bad ugeddontey barbarki sidi dukso ? Sababti haďdai jidki ma ghobeyso. Kristan :— Gortas wa kabaḫey warti Ti-dama̲a-kagoineysa ban arkey ninko billiseh wahu isasabey inan arki karo rerkas daḫdis ohortaiga jira ninki ghalabkaiga ikaghadi kara. Ki-I. bar. :— Ninkas yu yahai ? Kristan :— Ulaarkey inu billis yahai ; waḫ badan bu ilahadalayey, wahu heley in isasabey ; ilowse kolkey burtan ban arkey side jidki korkis kalaladey yan isstàgey râgnan maleh ; ka̲absadey iney madaḫaiga kuda̲ato. Ki-I-b. :— Ninkas obillis ah muḫu kushegey ? Kristan :— Wa warsadey: Hagge adka̲atey? wan ushegey. Ki-I.-b. :— Okolkasu maḫu kuhadley ? Kristan :— Wa warsadey :— nag iyo ilma ma ghobta ? Wan shegey-ohaďdana hadalkan ' Ilowse ma je̲elan karo iyaga side hore osababeh ghalabkan sidi ulus-ah oďabarki ban sideya '. Ki-I.-b. :— Okolkan muḫu yiri ? Kristan :— Wa ishegey :— Dakdik don hakalaghato ghalabkaga ; wahan iri :— ' Haulyari waḫan ban kujiri dona ; osababtas wahan uka̲aya albabkas oyer inan iladireyo mel antego oilafakinayo.' Waiyiri :— Aniga wahan kutusi dona jid kafi̲an ogaban osidi obadan oďan ta̲ab malaha ( wa tusey, Ader yehey,

kalamid iyo jjdkas bad ijedeysey adiga. Jidkanna wakukeneya aghalki aderko ofarsamo-leh, wa kaghadi kara ghalabyal leh eg ghalabkaga. Hadalkisna ban rumaistey wan gedomey jidkan, umaleyey shô ghalabkaiga dukso ilakaghadayo. Ilowse meshas kolkan tegey, wihi odan ban arkey sidi wa jirey, yan isstàgey, sidi ban shegey meshi sidi khattarah ban absidey, gortanse wah inan subiyo lehahai ma kasayo. Ki-I.-b. .— Isstàg oyer in ankushegayo wihi ohadal Ilahi. Waisstâgey wagarireyey. Ki-I-b. :— Firi ! hadidin ukushegaya hadalkis ; sababti hadi ma lakabihinayey kuwi udiden dulka korkis oloshegey dignin, kabadan ma kabahanayno anunki hadan Isaga udidna wanoshega dignin Irku kasobahaya. Haddana wa shegey :— Ninki hag-leh imankis yukunolanaya, ilowse ki gadal unoghoda gulbigaiga ninkas ma farhi dono. Haddana hadalkas sidan kumujiney :— Adiga neftaga ba ki halkan odibeh haddai ror kugeleysa. Wa kagaghabatey inad isskanato shaurki Ki kor Jira inad dib ukaeliso agtadha jidki nabadeh tan iyo khattar ahai olugudumiyo. Kristan ba hadalkan omaghley wa kufey sidi nin dintey. Wa oineyey " Ilkaiga wan âddumey ". Markanse Ki-Injilka-baraya wa arkey gaanta midigta ughobtey, wahu yiri :— Dad obin Adan way walosamaheya dembigodha odan iyo kafirkodha odan. Haahanin mid anamineynin, ilowse kiaminey. Kolkas Kristan wanoghodey inu wah yer ghulbi bu helo ; osidi marki ki hore Ki-Iujilka-bareya hortis yuisstagey ogirirey. Ki-Injilka-bareya wa shegey :— Kafian kufiri hadalkan kuhadli dona. Haggan ban kushegaya ki kugudaley warrankis oki aghalkis kukiey ninkas warrankis. Ki kulakulaney magais way Ki-duniadan-higmadedha-leh ; orun magahas loverava ; gharko isaga sababti Duniaddan dîntedha keliah radiskedha way ( sababtas wav orêrki " Aslub Fianah " masikitis gor walba wa kutegaya) ; ghar kaleh sababti dîntas wa ugujelada sababti dib iyo

hishod saleeb eh ugudama lokahelaya dîntas dahdedha ; osababti aslubtis ainkas way, wa donaya inu wihi jidkaiga orun wav kaeliyo. Shaurkis ba dahdis lazim inad sadeh wah ugunebatso.

Ki hore lazim adneb tahai oyeley inad jidki kaďaftey.

Ki labad sababti osherabey inad gedki saleebeh kunaato.

Ki sedahad sababti agtadha wa ďigey jidki inad raeyso okaaya meshi Sharia ogeri ah.

Ki hore lazim âdneeb tahai oyeley inad jidki kaďaftey ; haďdana adiga shaurkis inad akhbashey ; sababti wahan way owaladida shaurki Ilahi shaur nin higmaddi duniadan leh sababtis. Sayyidi ba shega :— Hogsada ineidin kugashan albabki oyerah (albabkas ah ban kugudira); sababti albabkas yer yahai nol ojedaya, iyagana kuwi ghoban ďowr yihin. Albabkan oyerah iyo jidkis inadkaďafeyso ninkas ohuneh wa yeley ; oinad ďow ahato wakaďumeysa. Sababtan neb aho inu yeley inad kaďaftey jidki, âd issnebaho haďdana sababti bad udegaisatey.

Ki labad lazim inad âdneeb tahai haushis owahan in gedki saleebeh lanao adige agtaga, olehdahai inad jeel khasanaddi Musrieh dama jeel saleebki kuarkeyso. Haďdana Suldanki Ki amana leh wakushegey :— Ki sobihi dona naftis wa duminaya ; ki iraaya oma neb ahado abbihis iyo habertis iyo nagtis iyo arurtis iyo walaladis iyo walalahis iyo haďdana noloshi neftis ma noghon karo radiskaiga aniga. Sababtas wakuiri ohadi nin obin Adan ah wa haul kugusasabi dono inad wahas darraddis geri ďimasho waheleyso orun way wahas neftis laan noloshi weliged ma heli karto lazim ilmihas inad naato. Ki sedahad lazim kunaato inu kuďigey jidki raayso oukaaya midiďinnima ogeri kenaysa meshis. Osababtas lazim inad hubsado ninkas khabarkis agtis

okudirey oside isaga ghalabkaga âdkamaghadi karo.

Ki lakuudirey inad raha kuhesho magais Ki sharia âduhaia habertis adon way iminkan wa jireysa oadonima hostedha iyada iyo ilmahedha ; owaiyai wah dad an lakugaran dahdis iyada burtan Sina way ti wa kaabsatey in madahaga kudao. Hadi ba iyada iyo ilmahedha adonima walohela, side adfiri karta inay adiga kusarrahinayan ? Sababtas ninkan Ki-sharia-âduhaïa ghalabkaga kukamadigi kara furan. Isaga agtis dad ghalabkis weli lakamaghadin, sidas in malaha onoghoto marki dambi wai Shariadi dahdedha ki hagh leh:ma kunoghon karto. Sababti Shariaddi shugulkedha dahdis dad kuwi jirayan iddina kasta ma furan kalayeli karo ghalabkis. Sababtas Kiduniada-higmadedha-leh wa marti owahaddi duled, oKi-Sharia-âduhaïa wahu khiyana leh owilkis, Adab, owajigis ghabow laarka ilowse ben way isagana kukalman ma karo. Irumaiso ! Nimankan doghdoghon hadalkodha odan lakujediya inlakukhinayo, jidki dahdis oaniga kudigey lakamabihinayso. Hadalkan kadambi Ki-Injilka-baraya wa shegey :— Irku hadalkaiga shahid iganogho. Gorto hadal iyo dab kabahey burtas oKristan meskîn ah kor jirtey timohis korki katâgan way owahu âd absi leh. Hadalkina sas uyiri :— Dadki odan Shariaddu shughulkis leh nalad hostedha wa jogayan ; sababti waladigey :— Dad walba magasidameyo wahi odan ladigey kitabki Shariaddi dahdis oinu subinayo wa lonalada.

Kristan dimasho keliged ukadinayey ; oin obaror ah wabilabey ; berigi neftis wanaladey oisaga iyo Ki-duniadan-higmaddis-leh waissarken, gor walba wa yiri :— Aniga ba kun gor doghon way oshaurkis ban maghley. Hishod badan wa arkey sababti billiskas shaurkis owihi damaa imanla leh walokusasabey ojidki run ah lakadafey. Kas kadambeh ushegey wahu Ki-Injilka-baraya ushegey sidan owihi ama hadal ama

maanahis way: Abbo mahad aragtey? Ma wah filan ah ikujira? Haddo ba mian noghon albabki oyer kutegi kara? Mian loikadafi donin, noghon leierinin ohishod badan leh? Wan ka-tobad-kena oninkas shaurkis wamaghley; ilowse gefkaiga ma leisamahi kara? Haddo waushegey Ki-Injilka-baraya wahas yiri:— Wa ugugeftey. Laba ba wihi ohunah jidkan kuyeshey. Jidki ron bad daftey inad murayal oladidey soraato. Ninkise ki albabki joga weli kuakhbalaya osas bad yeshey sababti wahu bin Adan jeelyahai; bes, foyig! haugeddomin mar kaleh, oâdkuhallawan lahaid jidki, kolkey dirifkis yer laushideya! Kolkas ba Kristan wahu digey inu dukso unoghodo. Ki-Injilka-baraya ba kolkey wa udunkadey ghosolko usiyey wauyiri:— Ilahi kasubiyo soodkadha. Kristan degdeg sokaey, nin kasta jidka kuarkey malahadley; ghof owarran uwarsadey isaga umajawabey. Wahu soodey sidi ki mel ladidey gefkis wakugeley, neftis ba aminah maissarkey intan jidki gor kaleh wa geley oKi-duniadan higmaddis-leh wanadis bu raey wakadafey; akhirade ba albabki yer kudowadey. Albabkina korkis walagudigey hadalkan:— Garaa olagufuraya! Wahu tuniomey laba gor ama sadeh, wayiri:— Halkan weli ban geli kara? Ki gudihi leh ma igafuraya oaniga maskineh sababtaiga, ki asi wa yeley. wahma lehahai? sas oyan gabeynaya weliged amantis irka dahdis; leimadalaya. Akhirade wa imadey albabki ghofko amal weyn leh magais Ghulbi-fian, wahu yiri:— Waya adiga? Hagge katimid? Mahad doneysa? Kristan:— Midko maskîn haggan wa joga dembi badan ghalabkis waloadâdey, Beled-Ki-Hallowaya ban kaimada, ilowse Burti Sahyoun ukaeya adadi oimaneya inleigabihinayo. Wa oghan dona, oleishegey, Ader, khabar in albabkan dahdis jidkas way, hadi akhbaleyso inad igelineyso. Ghalbifian:— Ghalbigaiga oidil ban akhbaley. Gortona albabki ugafurey. Intina Kristan gudaha usotalabeyey

kan kaleh hog ukughobtey. Kristan washegey : Wahan maanahis mahai yahai? Kan kaleh wa yiri :— Mel albabki kafog maaha durbar ya yâl ninki ki kor eh magais Beelzebub. Halkas dahdis isaga iyo kuwi isslajogan kuwi albabki soďowanayan fallar kuridan hadi shô intan aikugeli karin waďimanayan. Kristan :— Farhad ban arka ogarir eh. Kolkeyna wakageley ki albabki leh wawarsadey :— Yakutosey inad haggan kutimado? Kristan :— Ki-Injilka-baraya iamrey haggan uimado albabki sidan kugarao, haďdana bu yiri, Ader, inad adiga ishegi lahaid wah ban subi lazim. Gh.-fian :— Albabko furan walaguďigey hortaga, nin ohiri kara majiro. Kristan :— Haďdan fayidodi bilowgedha ban helaya okhatarki leh anisskuarkey. Gh.-fi. :— Mahadse keligaga wa timid. Kristan :— Sababti idna diriskaiga ma kasin halki okhatareh sidi aniga halkaiga wakasey. Gh.-fi. :— Nin mia iyaga dahdodha wayighin in adiga kuimaneyso. Kristan :— Waiyei nagtaiga iyo ilmahaiga waiarken gorti ti hore; âd ikayiren, inan noghodo; haďdana diriskaiga gharkodha iuyiren inan noghodo; (jog! ughailyen) ilowse ďegahaiga faro ban geliey kusoimaneyey. Gh.-fi. :— Ilowse ninna maaha adiga okuraey inad noghato kusasabin doneyey. Kristan :— Sas way, Laba ghofod, Ki-ma-ďegaisanaya iyo Ki-lageddinaya olabadan ba, ilowse kolkey igeddi weyyen sas ayarken, Ki-ma-ďegaisanaya wanoghodey oaiyey : Ki-lageddinayase wah gâban jidki ilajirey. Gh.-fi. :— Ilowse maha ukulagari weiyey? Kristan :— Labadaba waisslajirney inti wagarney warti Ti-damaakagoiya, tasna dahdedha neberko annu kadaney. Kolkasna diriskaiga Ki-lageddinaya khulub waarkey weli hor tegnin ma sababan ahain. Sababtas kubahey warti barbarkedha oaghalkis kuďow aha. Wahu iyiri :— Haïso adiga biladkas oamaneh keligaga okhaib aniga malihi. Waisskabahey jidkis anigana jidkaiga waimadey; isaga Ki-ma

degaisanaya bu karaey anigana iriddan kuimadey. Gh.-fi. :— Ilkis! kan ba maskin! osarka lrku amantis sidi thamaneh maaha oma akhbalin kas ganadis wa sidi ohadi sababanayo wihi yera inu kuhelo. Kristan :— Wah run eh aniga kushegey Ki-lageddinaya warkis ohadan haddana warkaiga kushego damantis aniga iyo isaga isskuhal midko ki kaleh wahba karon maaha. Run way isaga aghalkis kunoghodey, ilowse anigana waleigeddiney ojidki moteh wa geleyey oleisasabey, iddo billiseh Ki-duniadan-highmadis-leh korki damahis ikusasabey. Gh.-fi. :- Ma ninkas bu kukulaney ? Ma weiyyey - wa rabey inad Ki-Sharia-âduhaïa agtis raha kudoneyso. Labadodha âd khiyana leh. Mase shaurkis bad kuraatey ? Kristan :- Ha ; sidas usababadey. Wan bahey inan Ki-Sharia-âduhaïa kudono tan iyo inti kumaleyey burti oweyn mel aghalkis odow waikudai dono madahaiga korkis ; sababtas hagga lazim inan jogo. Gh.-fi. :— Dad badan wa kuhallaben osababti burtas ; dadna badan weli kuhallabi donan. Wah ron ah lakugumajibjibiyey adiga. Kristan :— Run way maogi wah ighobi laha haggas, aniga iyo Ki-Injika-bareya maisskuarki lahain oayan ronah gor kaleh ogorti ghulbigaiga wah hun harero wa arkeyey. Ilowse Ilahi naharistis way gor kaleh ninkas ikuimadey ; hadi isaga imagaranin haggan ma iman laha. Ilowse ayan way haddan imadey wajogaya haggan aniga sidi odembi leh iyo Ebbihaiga lawarrameya, wahasna kahakh hadi geri ikudumiyo burtas. Rahmase side âdbadan wa leisineya oaniga mehan leigelineya. Gh.-fi. :— Nin kasta ha ahade ma didno. Hadi wah hun âd badan dad wa yelen intian garin maloridayo. Sababtas, wadeygi fian, Kristan, aniga iraa, jidki ankutusaya olehdahai inad raado. Hortadha ilali ! Maid jidkan oduban (edidi) kuarkeysa ? Wahas jidki lazim adraado. Jidkan wasubiyen Abbayashi iyo Nebiyashi iyi Kristo Rusulyashis ; sidina lakhumi kara wa tosanyahai. Kan jidki way lazim adraado.

Kristan :— Ilowse shô gagadomi mayo wawaregi mayo marti kahallo kara ? Gh.-fi. :— Ha ! jid badan wajiran jidkan ogelan ; jidid kan ba jedi-jedi ah oballadan ; ilowse sidan wakalab'ihi karta jidki run iyo jidid hun ; jidki fian oruneh keligis warwareg wa dida oedidi way. Kolkas ruhyodaiga ban kuarkey Kristan weliba wa warsadey :-Mianad ikalmei karin ghalabki dabarkaigi korkis inan kaghado ? Sababti Kristan weli ma helin ghalabki olakeio, usigana sina ma kei karo hadi ma lokalmayo. Ki kaleh washegey :— Wahas oghalabkaga, rali laho ughad hadio intad gareyso meshi olagafakinaya ; mehas ghalabkaga dabarkaga isskadaeya khushigis. Kolkas Kristan wa bilabey inu sûnkis âdusubinayey, tayar jidki isskudigo. Ki kaleh ba ushegey :— Kolkey âddher maaha adkasoota, albabki adkategtey, Ki -Afki-Elinaya aghalkis waimaneysa ; iriddis garao, osiga wihi âdfian kutusaya. Kas kadambeh Kristan isskuheshiyey iyo wadegis, kanna gor kaleh Kristan jidkis Ilahi kuamaney. Kas kabaadi hore wategey tan iyo inti aghalki Ki-Afki-Elinaya wa garey ; iriddisna wahbadan wagaraey. Akhirade nin wayimid wahasyiri :— Ninki iriddi garaaya weiye ? Kristan :— Ader yehey ; haggan aniga nin way osafareh ; Waleiyiri, sahibki aghalkan wadeyashis midko waiyiri :— Hadi bad aghalkas sotagto fayido wa heleysa. Sababtas aghalki sahibkis inan warramo ban raba. Kas ba aghalki sahibkis uyiri ; abbar dambeh sahibki uimadey Kristan wa uwarsadey:— Mahad rabta ? Kristan :— Ader yehey, aniga nin way okabahey Beledki — ki-hallawaya, wan tegeya Burti-Sahyoun ; waleishegey, ninki ki kufadiya albabki jidki so hor joga wayiri :— Hadad haggas takto, sahibki — oadiga, ader, kas way — wihi fian kutuseya ojinsi jidkaga sababtis fayido bad kuheleysa. Ki-afki-elinaya :— Sodowo ! wakutusaya wahi dahdis ron bad heleysa. Wa amriey ninki oadeg aha :— Musbaha dar ! Wahasna Kristan buuyiri :— Iraa ! Waugeliey aghal

ogudah, wa amriey ki uadegeyey :— Iriddi fur! Wa furey. Kristan wa arkey wah sawîrah ghof isdoraya oekantis sidi osaga ishis irku kujeda, gaantis kitabki, ki uguronah aswata, farurtis runtu khanunkis lakuďiga, duniada agtedha ďabarkis wala jediyey; wajogsada sidi adanki wabarinaya; taj odhahab eh madahis korkis bu lalada. Kristan wa warsadey :— Mahas kan maanagis? Ki-af.-el. :— Ninki osawîrkan leh kun ghofod bu ron yahai. Sidi abba ilmayal bu ďali kara, bihintodha taabkis kuumuli kara, kolkey waloďaley nujiskodha neftis bu kara. Ishisna ma aragta irku kujedo, gaantis kitabki uguronah aswato, farurtis runtu khanunkis lakuďigo? Wahi oďan sas way inad kugufirinaya oshughulkis way inu wihi gharsonah dahdodha oghon bu helayo dad dembileh kufurayo, sidi haďdana adaragta inu jogsado uekyahai ki bin-Adan wabarinaya. Haďdana ma aragta in dushis duniada walajediya, taj madaha korkis aslalada? Sidas way in lakutuso inu duniadan halkedha sifududayo, wah bu maaha wa arko, asjeel yahai Adonkis uadegayo, duniada imaneysa dambi shak maaha abulgudkis wahan amanah losinayo, Sawîrkan kanhore ban kufiriyey sababti ninkan osawîrkis walaarka keliah hukum wa losiyey, meshi adtegeysa Ebbihedha wauidmey keliah inukutosiyo jidki dahdis mel kasta ďib adgeleyša. Nin kaleh ma jiro olosiyey mulkigan, Bes adiga ad kufirso wahi ankutosey hususo wahi adaragtey, oshô issaragteysan adiga iyo dad wa waj kufiriyan inay ron kutosayan ilowse jidkodha môt udega. Baadigas gaantis kughobtey ukugeyey ghol weyn sigo (uskag) olabuhaya sababtis weligi ba malafighey; kolkeyna wah yer wa arkey baadigas Ki-afki-elinaya nin asuyerey wahasyiri :— had (figh)! Hadi hadin asbilabey sigada kor sa obadan kakaey Kristan hog isskabahey. Gortas Ki-afki-elinaya wahaskuyiri adonto oagtis jogta :— Biyohi ken, gholki kushub! Gorti wahan wa subisey gholki farah lauhadeyey. Kristan :—

Amurtan ma̱anahedha sé way? Ki-afki-e̱linaya wa warsadey :— Gholkan wauekyahai roẖ bin Adan anlagua̱deynin Injîl ni̱madis ma̱anah. Sigada wauekiya dembigis oosli leh iyo wiẖi khudun ah oghulbigis, wa nejis laguyeley beni Adan naftis giddigis. Ninki horte kuẖadey Shariadda Mousa uekisey, ilowse iyada biyaha kentey kiskis kushubtey uekiey Injîlki. Kas bad aragtey in iminti ki horte ẖadado asbilabey sigada sidi kaka̱ey, lamaa̱deyey gholki, adiga neftadha ẖog isskabaẖey; sababtis ha lakufiriye in Shariaddi Mousa bedel oghulbigi dembileh laa̱deynaya dembigi wa nolayo ẖog uyelo, bin Adan roẖis daẖdis wabadano; waẖas gorti dembigi bin Adan waḋahiraya wa didaya osababti ẖog masiyo inu isskahosaiso. Haḋdana adontas wa aragtey biyaha gholki oḋan yeryer kushubshubeysey ofaraẖ laukaa̱deyey; kan wakufirineya Injîlki kolkey soḋowado ẖoghis ma̱ana ofareeda ghulbigi sogelinayo in gortas, sidi bad aragtey ogeberti sigada wa ḋigeysey obiyaha ḋulki yeryer shubshubeysey, sidas dembi lakaadkado laisskahosaisiyo, roẖina oimantis daẖdedha waloa̱dayo, owaẖas inay waegahadan kuwi Suldan oamanleh kufaḋisada.

Haḋdana ban arkey ruẖyodaiga daẖdedha Ki-afki-e̱lin-aya ukuhaistey ga̱anta, wugeliey ghol oyer, haggas laba anug oyeryer wafaḋiyen, ki walba gembarkis askufaḋiyey. Ki kaweyn maga̱is Dama̱a way, ki labad maga̱is Sabur way. Dama̱a wa leh eg inu weirweirsan aha ilowse Sabur àd bu hasileyey. Kristan ba warsadey :— Maẖa sababtis Dama̱a weirweirsan yahai? Ki-af-e̱l. :— Ma̱alin labadodha waraba inu sugo wiẖi lehyahai okuwi ugufareedah hadyo inti senad imaneysa bilowgedha; isagase waraba haḋdan ashelo kuwi ḋamantodha. Ilowse Sabur wa akhbaley sugideh. Ba̱adigis ban arkey nin uyimid Dama̱a joniad wadey waẖ thamanleh kujira, lugahis agtodha askuturey, anugas ba kugurey oafraẖey owakughosoley Sabur. Ilowse mudad yer ban arkey

odamantodha wakabihiyey wah bu ma haistey daro hun asghobey mahe. Kristan gortas Ki-af.-elinaya uyiri :— Isheg kabadan wahan maanahodha. Wahasyiri :— Labadan anug laba ain uegahayan; Damaa uekyahai dadki oduniadan leh, Saburna uekyahai kuwi duniada oimaneysa leh. Damaa sidi bad arkeysa haggan bu jeelada sanadan wihi odan ashelo; sidan way dadkas okuwi duniadan leh. Damaahodha wa adagyahai inay haddan kuhelayan wihi odan oghorah eh ghaibtodha bayhelayan; ma sugi karan inti sanadi ti imaneysa, maanahedha duniada oimaneysa. Methelkas—oshimbir gaanti luhaista karon way laba shimbir ooddi jogan bay kuarkayan sidi amarkis kawein Ilahi ballanodis odan duniada oimaneysa leh owihi laheli dona. Ilowse sidi bad aragtey dukhso wa bihiney odan sidi neberko weli wahbu ma haistey daro hun mahe, sas way odadki jinsigas halkodha noghonaya oduniada wadamaneya. Kristan :— Haddan ban arkey ; Sabur higmad karon lehyahai osabab badan way. Ki hore, wihi ugufiana usuga. Ki labad, haddana wihi isagaleh amantodha wahelaya oki kaleh weli wah ma haista daro hun mahe. Ki-af.-el. :— Haddana sabab kaleh kudari karta, wahas in duniada oimaneysa amantedha asuyal weligedha, ilowse wihi hagganleh markiba wadamaden. Damaa ukughosoley Sabur oinu neftis hormarey wihi fiantis ah bu heley ilowse sababtis sababti Sabur kayer inukughosileyo isaga owihi fiantis ah akhirade bu heley. Sababti ki hore meshis bihinayo lehyahai ki akhirade askunoghodo sababti han waktigis noghon lazim, hanse meshis ma bihinayo sababti ki meshis isaga bu noghoda maaha; ki ba khaibkis horti wa heley abbar kulehyahai inu bihinayo kas; ilowse ki akhirade waheley weligi inu haisado lehyahai, Sababtas waloshegey [hadal Mahmahdi dahdis] ninkas duyadi badan leh :— iminti adnoshey fiantadha wa ghadatey, Lazarona ghaibtis ohuneh, ilowse haddan isaga walonaharisa adigana walakuadaba.

Kristan :— Haddan ban kasa wihi haddan wajirayan damaahodha uguron mayo ilowse wihi oimanaya sugnintodha. Ki-af.-el. :— Run bad shegtey ; sababti wihi laarkaya mudad keligedha wa jogayan ilowse wihi malaarkayo weligi wa jirayan. Sidi wa asyahai ilowse ki laarkaya iyo damaahaini okorki leh wahay sidi diriseh mel issladigen, owihi dambigi imanaya iyo araggi duniada obin adan leh sidi way odad issmayaghan, sababtas okuwas hore sidi markiba isskuoghodan, kuwanna labad fogan todha weliga kalaelinaya.

Baadigas ruhyodeyga ban arkey Ki-afki-elinaya Kristan gaantis askughobtey mel asugeyey odab aslaha walahurey hussan odow. Haddana iddo asjogeyey dabkas hortis biyu gor walba kushubeyey, kudemin doney sas odabkas weliga kadher oka hur-weinah wa noghodey. Kristan wa warsadey :— Maha maanahas ah ? Ki-afki-el. :— Dabkan wahas uekyahai nima shughulkis ghulbigi dad dahdis; ki wakashubeya biyo àdkudemin dona sheydanku way; ilowse wahasna oaragta dabki hurkis wa badsadey dher uolola sababtis ba lakutusaya. Kolkas waugeiyey hussun galashis ; haggan askuarkey nin wel gaantis kuwata zeit (daisi) ujira haddana wah maudafin kuridey dabki dahdis, ilwose duman ah. Kristan bu shegev :—Wahan maha maanagis ? Ki-afki-el. :—Ninkan Sayyidki Kristo way, oma dafayo zeitki nimadis inu kubadiyo shughulki oghulbigi dahdis wa lakubilabey ; sas way owah kasta eli kara sheydanku wa subina, rohoda Kristo dadkis weli nima leh loarka. Wa sidi adaragtey ninki mehi asjogey hussunki galashis odabki hor in usoodo wahelayey, walakugutusa adeg vahai kuwi losheriba agtodha in laarko jinsi shughulkas onima rohodha sisubinaya, gor walba.

Wan arkey haddana oKi-afki-elinaya gor kaleh gaantis ughobtey mel fian ugevyey. Hagga aghal fian ishi uron yahai (rahaisinaya) sidi suldan leh wa jirey ; Kristo-leh àdbu kuafrahev. Haddana korkis wa arkey

dad hebel ojogen wasoodayen wahay ghoben guntasha odan odhahab eh. Kristan wahas yiri :— Rukhsad an ghobna an gelno ? Ki-afki-elinaya wughobey wuwadey inti iriddi hortis ; oilali ! dad àdbadan wa aruren meshi iriddi sidi ayjogen ogeli raben ilowse ka baghen. Haddana iriddi hortedha mel fog maaha meez bu haistey hortisna waladigey kitab iyo dawad hankus leh (oges lakusubiey). Wahu shughulkis inu nin walba ogeli laha bu digo. Haddana wa arkey oiriddi dahdedha wa jogen dad badan oghalab haistan iriddi kailalien osababtodha sidi kari karan inay kaelien hun subian dad odan ogeli donayan. Haddan Kristan wah wa yabey. Akhirade wa arkey okolkey dad odan wanehen oabsieh kuwi silah aywattan sababtodha, ninko wajigis àdgesieh karani asutegey washegey :— "Ader, kudigto magaaiga !" Karanigi wa khorey, sidi bu arkey, oki gesiah neberko saifkis wajidey khofiad obirreh asgashadey orod wawerarey nimanki osileh wattan oiriddi jogan. Iyaga wa àdukudufen. Ilowse isaga wahba ma akhbaleyin kalaghadayo, khulubsan, sarmoin iyo jiraho hog odîreh neberko wasiyey. Markanna isaga iyo kuwi sheriben eyelien gelidis jiraho badan isskusiyen wa goiyey isaga jidkis damantodha dahdodha wakari karey kudowan aghalkas fian wa geley. Neberko walakamaghley od fian odadki kuwi gudaha dahdodha okuwi aghalki korkis usoonayan odkodha wahasyirahden :— "Mel odow odow amanti adheleysa abadan eh." Asgaley ba, maro lehiev sidi maroinkodha. Kristan amusan ughosoley ofarah ah, washegey :—Wan umalaya wahas maanahis ban oghahai. Baadigas wa shegey :— Haddan rali laho aniga waisskabaha. Ki-afki-elinaya wahasyiri :— Sug bes wah kaleh oyer weli ankutusa ; baadigas wa baheysa. Gaanta ba gor kaleh kughobtey wa wadey ghol kaleh ugeliey àdmugdig. Dahdis nin okufadisadey sàbki wein birah dahdis lughobtey. Ninkas hadi loilaliyo oil ghobey. Wa fadiey ohos asilaliey gaamohis waladùbey. Waraghna

uhinragey sidi onoloshi lakagoieyey. Kristan wa shegey :— "Kan maanahis muhu way?" Jawab ba Ki-afki-elinaya ukusiyey osidan way :— "Ulahadal!" Kristan ninki waushegey :— Adiga weyyey? Usiga wa ujawabey. Halkaigi sidi horte maaha. Kristan :— Halkaga ki horte se aha? Wa shegey ninkas :— Wahba wà aniga issdabeyey kuwi kaleh walodabeyey oaniga nin fian odînta yaghan; Wah ba wà, sidi ban modhey, Irku Beledkis usoonayey; kolkasna ban kua-frahey ogor kasta ghulbigi fikr kugeley inan hagga ugaranayo. Kristan :— Haddanse halkaga side yahai? Ninki :— Haddanan wa nin odamaa lakagoiyey; halkan dahdis osidi sabkan obireh wa leihidey. Makabahi karo. Ilkaiga ohaddan makabahi karo!

Kristan: Sidese kugashey halkan? Ninki :— Aniga ba kuilali dafey; dan khias leh ban kadafey, damaahaiga oiman laan bankafurey sidi ki hakmahi faraskis wa dafa; amr Ilahi iftinkis, iyo Isaga naharistis iyo neftaiga ban dembi ukalaeliey; wan ilayey Ilahi Rohis, wa kakaey Isaga; Wan bilabey ouladelayey sheydanku waidowadey isaga; Ilahi ban adaisey, waidafey Isaga; wadnahaiga sidi ban adkeyey, toba ma kari karo. Kristan ba Ki-afki-elin-aya wawarsadey :— Ninkose sidan ah wahba mianu arki karin khusad mahe? Ki-afki-elinaya :— Uwarso isaga! Kristan ba uwarsadey :— Wah ba mian lasugi karin, wahas mahe oadiga sàbki obireh okhusadeh shardi lakugughobeya? Ninki :— Wahba ma laghobo. Kristan :— Muhu? Ki-duai-ghoba Wilkis rahmad badan bu lehyahai. Ninki :— Stalabti aniga uku ghodobey gor labad agtaiga (oghulbigi dahdis). Wan ufududeyey Isaga oNeftis; Wan fududeyey haghhis; wan hisabey diggis wah ghudus laan ah; wan dandansadey Roh nimoleh; sababtas waisskudigey neftaiga dibad balla-noda odan, gortanna wah keliah ihadaya, wahas bajino

way bajino oabsin leh, bajino onehinleh olei kuhuba in hukun way iyo ado dabeh oigubaya oaniga wa adow ainkis ah. Kristan :— Muhu halkan neftaga wakugelisey? Ninki :—Duniadan wihi lahela daraddodha damayodedha daradda, rahyodedha daradda, fayidoinkedha daradda oissballaney aniga inan dahdodha issrahaisinayo badan owah tarkodha maan ah dahdis. Ilowse haddan wah kasta okasleh waikukhaninaya waiunaya sidi dirhigi odableh. Kristan :— Tobadse weli ma keni karta? Ninki :— Ilahi mel tobad eh waididey. Hadalkis sugnin oaminah ilamatosaya; Naftis ba ihidey sàbkan obireh dahdis; nimanki ba odan duniada dahdedha ikabihi ma karan. Ilkaiga oweligis ah gor weliged side ban legdami kara ilkas oinan lakulmayo gorti weliged dahdedha ban lehahai. Ki-af.-el. Kristan ushegey :— Hususo beri walba ninkan ilkis adiga weliga isskadowr inad halkan ma gesho. Kristan :— Wahan oabsin ah run way. Ilahi ha ikalmayo inan ahado nin okuilalineh okhiaseh oki tukaya inan isskadowro sababti ninkas ilkis. Ader yehey! haddan mianan lehahai inan safaro jidkaiga? Ki-af.-el. :— Wah yer sug! midba weli ankufirina; baadigis wa bahaysa safarkaga. Bes way gor kaleh Kristan gaantis askughobtey uku wadey ghol; haggas iddo sarirtis kukaeya oiminti marohis asguntadey wakharkharey. Kristan ba wahasyiri: Ninkan okharkhareya mahai sidi yela? Ki-af.-elinaya ninki wuyiri :— Usheg sabab osidi yesha! Ninki ba bilabey ohadley :— Manta hurdo dahdedha wa ruhyodey oilali! irka wa àdmadowadey gugaa iyo hilà sidi way oûgu-absieh ban higey inan dib kahàdeyso. Wan ilaliyey kor ruhyodaiga dahedha darurohi wa arkey omarayen sidi ma destur way dukhso soonayen; neberko baadigas saut wein tarumbeta ban maghley, haddana ban arkey nin odarurto fadiyeyey ollki Irku leh okunkun way kamid

isslaraen đamantodha dab uđalalayen oirka đamantis olol ugubanayey. Kolkas ban maghley saut oshegey :— Kukaa, kuwi meyyid tihin ! Kaleya huhunki ! Neberko wadilaiyey dakabodi ogumburah, kuburodi walafurey, kuwi meyyid ahayen gudihodha kaimaden. Barkodha àd badan uafrahen kor ayilaliyen ; barkodha wa sheriben in buroha hostodha isskukhariyen. Sas way oban arkey ninkas odarurti korkedha asfađinayey, kitabki kufurey oyiri :— Duniadan đamantedha dadkedha halkan ha đowadan. Ilowse oolol adag ah sababtis hortis kabahey nafas okufilan way isaga iyo iyaga dahdodha sidi odastur ah hakunki iyo kuwi lahukumey dahdodha. Hađdana ban maghley in kuwi uadegayen ninkas odarurti korkedha wa joga waloamrey :— Auski okhasabah iyo ki gargor ah iyo ki khushash ah kaghada warti dabeh kugushuba ! Neberko gudkas ogun ma leh walafurey meshi an jogey àd agtedha : badnan okhikh iyo đuhul dabeh afkis kabahey osautiyal oabsileh kuraayen. Hađdana dadkas naftodha gor kaleh waloamrey :— Sarenkaiga khalinkaiga dahdis soaruriya ! Neberko ban arkey dad badan kor uloghadey darurohi dahdodha kalogeyyey, ilowse aniga dîb leiđafey. Hađdana ban sheribey isskhariyo wa kari wai sababti ninkas odarurti korkedha gor walba iutàgeyey ishis ; hađdana ban husustey dembigaiga hisabtodha ; ghulbigaiga (dhamir) harero iishtakeyey. Gortasna hurdu kakaey. Kristan :— Mahadse sidi uabsatey mukhan ? Ninki :— wahan modey hukunki ayantis wa lagarey, anigase tayar ma anahain : wahan kabadan iabsiyey malaigoin inay dad badan soururiyen anigase dib ikađafen : hađdana gudki oadabeh meshi an jogey afkis wa furey. Hađdana dhamirkaiga iđib yeley ; sidina ban modey Hakunki gor walba ishis iutàgey owajigis ado laha. Kolkas Ki-afki elinaya Kristan ushegey :— Ma amarkan ođan àd ufirsatey ? Kristan :— Ha ! Sugnin fian iugeliney iyo absi. Ki-af, el. :— Ron ah, bes sidi hususo ođan, in uekahado ushi

mudnineh labada gesod agtodha hor soon kugumukhuno jidkaga owajibeh. Kas kabaadi Kristan wa bilabey sunkis wahidaneyey tayar inu safaro issuyeley. Ki-afki-elinaya wahasyiri :— Roh farigeh gor walba, wadeygi fian Kristan, ha wehelkaga kujiro, tos ukuwado sas Beledki jidkis. Kristan ba jidkis kategey hes oaman eh washegey.

Ruhyodaiga ban arkey labada mel hussun osleh-yahai ojidki Kristan hor lotusey. Hussunkina maghais "Salamad" way. Kristan ba jidkan waarorayey oisaga hamilleh ilowse ghalabkas odabarki korkis sababtis ugu-dibah wa tegey. Sas way hadyo inti mel kor oyer astegey omehas ged salîbeh aslaha, meshanna hostedha oyer khabri dàfti kuyil. Ruhyodaiga ban arkey Kristan gorto odowadey salîbkas ghalabkis garabki lakafurfurey, darabkis kadaey wagalangalashey tan iyo inti khabrikan dahdis kudaey waan arkin ba. Kolkas Kristo-leh àd uafrahey oraholeh khulbigis bu kughosoley washegey :— Wahu raho isiyey oilkis dahdis, dimashadis dahdis wa inoleyey. Baadigas mudado yer ojogsaneh ilaliyey oyabey ; sababti wah yab eh bu arkey sidkis walaka-ghadey sababtis gortas salîbki ilaliyey. Gor ogor badan bu ilaliyey tan iyo inti elashi omadah leh durdur biyoh-odha anodis kadiren. Iminti bu jogsadey ishis ilmoin kabahey, ilali ! sadeh Ghofod öDalal-badan-leh ayuim-aden wausalamen :— Nabad agtadha ! Ki hortena ushegey :— Dembiodadha halaaffiyo. Ki labad marodis odarar hun ah wakafurey, wah usub ah ugeliyey ; ki sadehad foddis kualamiyey khat omurleh usiyey, waush-egey :— Tan kuilali iminti orodeysa okolkey addowato Beled Irkueh Iriddis kubihi. Sadehdi ghof ba isskabahen ; gortasba Kristan sedah gor farah kabodbodey ojidkis ghobtey oheseyey.

Kolkas ruhyodaiga ban kuarkey sidi wa tegey hadyo inti hosti. Haggas ya kuarkey sadeh nin wah yer jidki kadher wahai ohurudayen lugtodha bir ulageliey. Midko

magais Doghon way olabad magais Ajis ki sadeh magais Amar-wein way. Kolkey Kristo-leh wa uarkey halkas oollayen bu ďowadey bal in ukakei kara, od wein wahas yiri :— Idinka uektihin kuwi jifsadan markab daghalkis korkis sababti hostini Badki Moteh ogun maleh wajiraya. Haďdaba kaa okakaleya ! Ralina lahada oaniga waidin kalmanaya salasilini okujirtan in kabahtan wakudarey oushegey :— Run way hadi wa ďowado ki haggan ohagga sidi libah ujibada wabahaya, idinka noghonaysan bob oiligis bu kugumimaya. Kolkas iyaga ishodha ukuadayen osas way ujawaben ; — Doghon ba shegey :— Khatar ma arka ; Ajis washegey :— Wah yer hurdo kabadan ; Amar-wein ushegey :— Burmil kasta in sal neftis kutàgo lehyahai. Sida wa noghoda ohurdu gor kaleh kughobayen, Kristan wa isskabahey. Ilowse il waghobey sababti dad khatar oainkas loghobey sidi isaga tolimadis hishmad oabàlgudah kusin wayen darradi karamad ukalmanaya, ohurdu wa ukakiey, oukushauradey fianah, tayar way asukalmayo inay silsiladdi isskabihinayan. Sidi ghulbigi waweiweireyey oneberko asarkey laba ghof hussun obidaheh ayfulen jidki yerah aykudaen aygelen. Midko magais way Ki-dîn-aleshedha-kughobta, ki labad magais Ki-wajigis-helad-ah. Haďdaba bay uďowaden jidkis oisaga ulahadley wahas yiri :— Idinki obillis ah, inte katimiden inte utegeysan ? Ki-dîn-al.-kughod. Iyo Ki-waj.-hel-ah :—

Walanoďaley beled magais Aman omaďanah, wa bahna Bur Sahyoun sifa inan helno.

Kristan :— Mahidin ma gelin albabki olaďisey horta jidkan ? Ma oghtihin inu laďigey :— Ki ma gelo illinki askorase mel kaleh ninkas ki hadnin hadeya otug ah. Wahay yirahden :-- Dadki oďan obeledkayagi leh wahai arkayan hudi albabki aykugelayan bilash waweirweiri lahaiyen ; sababtas dasturkodha ayghobtan

inay goian jidki đhererkis ohussunki lagaboda sidi anyelney annagu. Kristan :— Ilowse gef ma hisabaya, kalasubey oEbbo Ki Beledkis wa donayna hadi wa hadalkis đeginsan weiden? Ki-dîn-aleshedha-kughob. iyo Ki-waj-hél.-ah :— Hadalkan haisskuweirweirin; wahan on yelna destur leh odesturkan agtis marag inusino wakari karna (hadi dan leh) mudadis kun senad okabadan. Kristan :— Ilowse desturkini ma laakhbalo kadi korkis? Ki-d.-a.-k. iyo Ki-w.-h.-ah :— Destur hadi wa lahaiistey mudadis kun sanad okabadan kadi oadileh bu heli laha inu halal asyahai oshak maleh. Hadina ba ankagelna maha uissweirweirayna jidma lagagalo? Hadi dahdis jogna, sas kujogna: adiga ba jidki wa jogta, wa arkeyna inad iriddi wa kageshey, annagana ba jidki wajogna, ohussunki ankubodney dahdis kasodaney; side halkaga halkayaga karonah? Kristan :— Aniga amrki Ebbihaiga waraaya, idinka waraaysan ghulbigini omiyirla lauwalagha. Gorti ba idinki tug leidinarka ojidki Ebbihis agtis, wanumalaya oakhbali maysan jidki đamantis sidi kuwi niman aminah. Hoggini kugeshen oamurkis kalaheshen; hoggini kukategeysan onaharistis kalaheleysan. Wahay wah badan ma jawaben hadalkan mahe :— Shaurkaga ra adiga! Wahan arkey odambigas waaykubahayen nin kasta shaurkis uraey wah badan ma lahadlayen; kan mahe olabadas ghof Kristan ushegen :— Ain ba okhanunoah iyo hererah wa yeshana inannu annagu sidi adiga okaleh aminah waurai lahain. Sas way owah kaleh ma aragno adiga iyo annaga marodas mahe odabarkaga korkis; tasna, sidi arkena, shô jirakaga gharkodha wakusiyen inay khawantadha hishodedha kudabolan.

Kristan :— Sababtis albabki eidin ma gelin wihi khanuneh iyo hereh kumabihinaya salamoah. Marodanna

owa leiguntiyey Ebbo meshi ban kutega wa isiyey orun way tirahden leidiyey khawantaiga sababtedha oladabolo. Alamaddi ban kughoba ahsanki isubiney ; sababti maan maro ghobin hore ďaran hun ah mahe. Haďdana fikrigas jidki raīsan bu ghobaya inu gorti ban kugaro iriddi Beledki Ki Ebbihis wa ikasayo fareedeh sababtis marodis ďabaakaiga waleiguntiey, oiusiyey ib maleh gortey marodaigi ohun asifurey. Haďdana alama leiusarey folkaiga, hadi sidi noghodo idinka maeidinilalinin. Tas ghofko oEbbihaiga wadeyalkis ad ujel ahayan midko asısarey berigas sidki an watey garab ikadaey. Haďdana waidinshegaya, okolkas warkad khutah omuhurleh ilasiyey, inan nahari wa helo okuakhria jidki dahdis ; leishegeyna :— Tas kubihi kolkey adgarto Iriddi Irku ; ishaira oruneh inan dambigedha ban kugelaya aniga. Wahan modha wahas walba idinka ma ghobtan okas sababtis albabki maeidingelin. Wahas walba jawab maeiusinin, keligi issilaliyen oghosolen. Kolkas ban arkey ďamantodha hor bahen ; ilowse Kristan ba hortodha wabahey omalawarramin ghalbigis isslawarramey mahe ; wahas marko ooineh marko oladnan ; haďdana gor badan bu kuakhriyey khutki usiyey midko ghofodas oďalal badan waloghabojiyey.

Wan arkey wategen ďamantodha inti aygaren burti Dibeh agtedha oburti hostedha el aslaha. Haďdana issla mel laba jid kaleh aslahaid ojidki albabki kabahey isskuhorimaden ; jidko gaanti bideh kutegey iyo jidki labad gaanti midig, oburti hostedha ; ilowse jidki yerah burti âdkortegey otosanah, ohadi ďas korlategayo magais Dib way. Kristan haďdan wakutegey elki biyihis asďamey inu ghulbigis asghobojio, baadigas fulad wa bilabey, ogabai wahasyiri :—

Burtan wa dhertahai Ilowse dherant edha
jid way nolol, dibtanta imaelinaya
Hog ghobo, ghulbigaiga, absi laan aho!
Fulad ban jelada; jid ki haghah odibleh
Jid sahil haghla adab kas dambeh karon ah.

Labadasna ekaleh burti agtedha wa garen. Ilowse kolkey wa arken burtas dher way oadeg sood kor lafula haddana laba jid kaleh iyada dorashada bay lehahavan, omodhan jididkan iyo jidki Kristan waghobey isskuimanayan burti dinahedha ekaleh hostedha sababtas shaur aysubiyan inay labadas jid ayraayan. Jidko wa magais Khatar way, ojid kaleh magais Halak way. Ninko ba wahu ghobtey jidki laguyerey Khatar, wa jidkas ukugeyyey mel dûreh oged badan; ninki kaleh ba wahu âdtosan ghobtey jidki Halak ah, wahan ukugevyey mel ban eh obaladan walabuhata buro wawein omugdigeh; haggas wa issdufey luggis wadaev oweliga ma jogey. Kolkas ishaiga ban raey Kristan oburti askufulayey; wan uilaliey ohorte wa arorey wah gor kadambeh assoodey, kasna kadambeh koridi wa bilabey jilibkis iyo gaantis sababti meshas koridis adag ah. Koridi ba sidi badkedha walagarey bul fareedah; wahan kudisey burti Ebbihedha kuwi safar leh oatobayan sababtodha inaykunefsadan. Mehan ba wagaley Kristan, inu kunefsado wafadisey. Baadigas khutkis labtis askabihiyey ghoboji akhrigi kuheley, haddana ilali asbilabey gor labad marodas okolkey meshi saleebki kujogey lusiyey. Sas way oyer wa afrahey dambi gurdo bilabey baadigas hurdo âdasughobtey; sas meshas walohelen tan iyo inti habenki wadowadey; hurudadi dahdedha khutkis gaantis kadaey. Iminti asjifey iddo wauyimid wa ukakeyey wahasyiri:— Harunti uteg! ajisah

yehey ! firso wihi jidkedha higmad adheshide ! Neberko Kristan wa kaey dakso asbahey inti mesha burti korkedha astegey. Kolkey burti korkedha wa garey laba nin uyimiden ror ror, midko magais Fulei, ki labad magais Ki-imantis-wai : Kristan waushegey :— Idinka obillis ah, maha kadaey ? jidkini edis ujedaysan. Fulei wajawabey :— Wannu kutegeyney burti Sahyoun ankufulney mehas ulus ah, ilinti jidki kasitegno sas okhatar kubadnana. Sababtas wa gadomney wasonoghoneyna. Ki-imantis-wai :— Sas ban kuoggolahai owah yer horena laba libah wa jirayan jidki dahdis. Inay hurudayan maan oghin iney sojedayan maan oghin ; wahanna modney wah kaleh maannu karin in hadi mehan andowaneyno neberko nojehjehi lahayen. Kristan wa jawabey :— Iabsineysan ; ilowse inte an kurori dona mel salamad inan kuhelo. Hadi ankunoghodo dulkaiga kas waladigey in dab iyo terakh kuhallobayo shaka anlehain haggas ban dimanaya ; Beled olrkueh hadi an tegi karo wan noghonayo haggas salamadah ; sharti an sababo. Gadal hadi an noghodo dimasho way keligedha ; hore hadi an tego dimasho absidedha way iyo kas kadambe noloshi weliged : weli hore an sitegeya. Haddaba Fulei iyo Ki-imantis-wai hos kategen ororah, Kristanna jidkis wa heley. Kolkasse ogor kaleh bu firsadey dadkas hadalkodha, khutkis labti dahdis gaanti wa doney inu akhrio, ghaboji kuhelo ; wa jeribey odoney wa wayyey. Gortas Kristan âdnehey asyeli wa wayyey ; owahi weyyey faraj gor walba ukasinavey. Irku Beledkis ugelin laha. Meshan ba badan waweirweir ugeleyey, wahas ha yele ma kasin. Khatimadis wahususadey inu huruday bulki oburti dinahis kuladisey ; jilib bu jogsadey Ilahi samahhis watugey amalkas odoghonah sababtis ; baadigas wanoghodey khutkis inu kudono.

Wayyese Kristan alolhumadis side way bu shegi kara imin walba asnoghonayey? Marmar waragh wahinragey marmar ishis biyo kabihiey gor badan isshumadey ghulbigis sababti mehas bu hurudey, mehi ladisey sabab kaleh maaha wah yer inu taabkis askughobojinayo mahe. Sidas galal bu noghodey wajirey meshan iyo meshas jidki wafiliney inu shô helayo khutkas ofaraj sidi gor badan usiyey jidkis. Wategey inti bulki waarkey mel askufadisey osehedey ; imintasse olaarkey meshas ghulbigi hog kabadan uhumeyey, waha sababtis hurdodis ohuneh side wa subiyey gor kaleh lohususiyey. Haddaba sas wa sotegeyey ohurdodis ogefeh wakuoieyey wahasyiri :— Ilkaiga oaniga malin anhurdey, dibki barkis wa hurdey ; sidan korki damaahis ban kafurey korkaiga damaahis darraddis ban siyey rahadas owahba sababtis maladigey oburti Ebbihedha wakudisey, wahas mahe kuwi hajinayan inay naftodha odâlleh kufarijiyan. Side badan otalab bilash ban tegey ! Sidi wa noghodey ilmihi Israîl halkodha odibad ah lokuwaregiyey gelgesha Badi Sufeh ; sas way aniga human eh ankusafra afrah bedelkis oban helo hadanan hurdadas gefah ban helen, omel side odher haddan jidkaiga ban garo. Sedah kol maan didi karin inan maro yer yer jidkan neberko badilkis haddana malin wa damanaya korkaiga habenki wadowada. Hun way inan sehedey ! Gortan ba bulki wa garey ; abbar wafadisey wa oiyey ; akhirtankase (oKristan ayankis wa ghobey) sidi ghulubsanah gembarki hostis ishi ujedey haggas khutkis soilaliyey dakso kughatey, wa kharkhareyey, labtis wa geliyey. Ya shegi kara side ninkas wa afrahey gorti khutkis mar kaleh wa heley ? Sababti khutkis dabti nolantis way inu helayo, iyo akhbalkis mehi bu rabey inu garo. Sababtas labtis dahdedha bu geliyey, Ilahi mahadiyey oKi tos uwadey ishis meshi khutki ojirey

gor labad wasafarey raintis dahdedha biyo ishis kabaheyev. Mahase odakdak meshas inti burti madah edha askukorev! Ilowse kor intusan asgarin gorahdu wakudaatey Kristan korkis; sababtas ba gor kaleh hurudis omisirlaanah wa hususey, wabilabey naharis isskuarko washegey: Hurdo yehey ogefleh maha malaha ban ragsan ugudaya; haddaba lehahai inan safarayo oghorahdu nurkedha anahain, ojidki mugdig isskukharinava, ood duwaghah odîrin ban maghla sababtis hurdadi kuhumayey. Wa husustey haddanna Fulei iyo Ki-imantis-wai warkodha inay lobajiney libaho wa arken. Ghulbigi gor labad isskushauriey :— Dawaghtan awadu aywerigan wahay bob donan ohadi jidki isskuarkan iyo aniga senyelah ankuroriyo? Side ban rori karo oma ijehjehinayan? Sas way ohore askutegey gortise dantis sidi kuoineyey ishis kor ugeyyey; wa ilali! aghal wa jirey âdfian ah osidi Sultanleh, magais 'Ghurohsan', wahu kuyil jidki âd agtis. Riyodkaiga dahdis ban kuarkey sidi dukso hore askutegey, in hadi kari karo lodowayo meshas dahdedha, awadu asfadisado. Intise an yer hore astegin mel âdedidi kugeley laba minit keliged sood tan iyo aghal yer obawwabkileh. Gortina mehas ishis âd kufurey. Ilali! wahu arkey laba libah jidki dahdis. Wa modey :— Haddan ban arka khatarkas oFulei iyo Ki-imantis-wai kaloeriey oaynoghoden. (Libahyodas ba walahidey silsilad ilowse Kristan silsilad ma arkin). Wa absadey wa firsadey :— Daruri aniga galal unoghonaya iyaga kadaba. Sababti way bu modey. hortis dimasho way keligedha. Ilowse Bawwabki oaghal yer kujogey, magais 'Ki dowra sifian', oarkeyev Kristan inu jogey sidi galal isskunoghon doney, wa od kayerey wa shegey :— Hog sidi over ma kughobta? Ha kuabsan labadi libah, sababtis silsilad lakuhida; haggasna waladigey kuwi imanleh imantodha inlabejiyo, kuwina

iman anlahain inay dahirnimo kukamughan; jidki dahdis ďaf, owah ba oďibeh ma arkeyso.

Kolkas ban arkey inu hor tegey ogarireyey obaghey libahyodas sababtodha, ilowse bawwabki amrihis oad ilaliyey yerki odîreh wa maghley wahma lohumain, kolkas saabada isskudifadey usosoodey, inti wajogey iriddi omeshi bawwabki hortedha. Kristan ba bawwabki ushegey:— Ader yehey, aghalkan ainkis mia? oma awaďi faďin kara? Bawwabki wa jiwabey:— Aghalki waludisey Ebbehi burti waďisey kuwi Irku hajinayan inay kunafsadan salamad kuhelan. Haďdana bawwabki uwarsadey:— Inte ad katimid? Inted kutegeysa? Kristan:— Wan kabahey Beledka Ki-hallawaya, outega inti Burti Sahyoun; ilowse sababtis ghorahdu wa daadey wahan raba obariya mehan an sehedo. Bawwabki:—Magahaga wa ye? Kristan:—Magahaiga haďdan wa Kristan, hortise, Nima-laan aha; wa Yafeth ghabilgis leh ollahi usasabaya inay kuollan hemadi Shem. Bawwab:— Mahadse sidi kuragtey? ghorahdu wadaey. Kristoleh:— Beri kahore ban kugari laha, hadanan, ilkaiga! sehan bulki ojira burti dinahedha. Iminse dher way, kas ojirey, ban gari laha hadanan lumin khutkaiga omarageh, gorti ban sehedey, laantis kutegin burti madahedha, okolkey labti ma helinin hog way oalolhumaah kunoghodo inti meshi kusehedey; meshas ban kughadey sas haďdan wa imadey. Bawwabki:— Fian! Wan yereya ugubodki omehan jogtan midko oiyada hadi wa jeelto hadalkaga beykukeneysa dadki kaleh mehan ojogan sidi desturi way haggan. Bawwabki Ki-ďowra-sifian ba gando udofey, dukso olakudofey wasotagtey gebeďo ulus oamalah oghurohsan, magaedha "Fojigan", wahastiri.—Mahu leiyerey? Bawwabki wajawabey:—Ninkas Beledki Ki-hallawaya Burti Sahyoun sodal kasojedaya

Adasudaley, gorahdu wadaatey bes inu rukhsad kuheli karo awadi mehan asbariyo iweidiyey, wan shegey inan kuyerayo oadiga ulahadleysa dabadis wahi fian kufirineysa wa yeli karta, sidi dasturi way haggan. Gebeddas wawarsatey :— Inted katimid, intead tegeysa ? Wakushegey. Wawarsatey :—Side jidki sogeli kartey? Wakushegey. Baadigas wawarsatey :—Jidkan mahad kuaragtey, maha kughobtey? Wakushegey. Akhirante wawarsatey :—Magaaga wayye? Wa shegey :—Magaaiga wa Kristo-leh ; osidi kabadan wan raba an fadisto haggan sababti hadan run uarkey, burti Ebbehedha kudisey aghalkan kuwi hajinayan sababtodha okughobojinayan osalamad kuhelayan. Iyada ba amus ughosoley, ishedhase biyo wa jirey; wah yer oamusnatey kadembeh wahaytiri :— Wan kayeraya laba iyo sadeh dad kaleh haggan olajogayan. Iriddina kurortey bananka ukayertey Miyir iyo Ibadad iyo Jeel; wahay owah yer kabadan walahadlen kuwi kaleh dahdodha bay ghobten. Intodhana badan laukulmayen iriddi aghalki washegen:— Sodowo, adiga oki Ebbihi barakadis losiyey; aghalkan burti Ebbihis bu kudisey in dadki haj-leh adiga okaleh loawinayan. Bes madahis salam ufororsadey, iyaga kadaba aghalki dahdis kuraey. Kolkey bu wa geley, wa fadistey wah uabsineyen ; wayshauren in gharkodha Kristan ulahadiayan hadyo inti hungurigi oghalabtaeh kunoghonayo in iminti kusugayan fayido laheley ; wa heshimayen Miyir iyo Ibadad iyo Jeel inay ulahadlayan sasna wa bilaben. Ibadad :—Kristan yehey ! wadayaga oronah ! aniga sidi jeelan ba nahai awa kusodoweyna wan kulahadalno wihi odan hajkaga wakughobatey hadi shô fayido bannu kuheli karno. Kristan :— Wan akhbaley oghulbigaiga damantis; wa afraha fikrigini sidi oronah sababtis. Ibadad :— Maha ghulbigaga wageliey inad noloshi ohajileh wa ghobto ? Kristan :—Waleikaeriey dulkaiga mehi

waleidaley sankhad abɛiah owahu degtaiga wajirey; inan hallawanayo bila shak hadi meshi kujira weli an jogo. Ibadad :—Mahese jidkan wa jesatey gorti dulkaga wabahatey? Kristan :—Sidi Ilahi jeel aha wa noghodey; sababti iminti absigaiga oinan hallawayo, jid oinan kagubaho lehaha maan kasin. Ilowse gortas wanoghodey oninko iyimid magais Ki-Injil-kabaraya iminti an kharkharey ooiyey waitusey meshi albabki over mahe maan uhelen; sas wuidigey jidki oaniga tos kusosoodey aghalkan. Ibâdad :— Mianadse Ki-afki-elinaya aghalkis wamarin? Kristo-leh :—Ha! Haggas ban arkey wihi sidan way oma hilmanayo inti nol ahai, khaseh sadeh wah okan, sidê Kristo shughulkis onimaeh osheydan, wah ba ma tara inu eliyo bin Adanki ghulbigis dahdis wakuyeleya; sidena nin hebel sidi dembi wageliey Ilahi rahmaddis weli wah ma kuarkin; haddana wah wa riyodey ki asmodey hurdadis hukunki avankis walagarey. Ibadad :— Side way, ma maghashey oisaga rivodkis wawarramey? Kristan :— Ha! oriyodko lagaab sada sidi ban modey; ghulbigaiga lakhaniyey gorti kuwarrameyey, ilowse ban afraha inan maghley. Ibadad :— Ma kan bad aragtey keliah Ki-afki-elinaya aghalkis dahdis? Kristan :—Maya! wa igeyyey mel oitusev aghal ghuroh leh oside dadki haggas ojirayen maroin odhahab eh wa ghobten, onin asyimid osujaaeh sefki jid wa goiyey dadki dahdodha oghalab waten oiriddi jogsan ah inay ukaelian; oside losòdowavey aman weliged inu kughobavo. Wan arkey wihi sidan way aloshadaiga wabuhsamey afrah. Wan rabi laha senado dama asfadio ninkas wanaksan aghalkis, hadanan kasin jidkaiga kafol way. Ibadad :—Haddana mahad jidki aragtev? Kristan :— Mahan kuarkey? Kolkev an yer osooddev wahas sidi ghulbigi kuarkev uekaha midko oged korkis kalaladev, dig askabahey. Isagana ban sodaiey keliah oghalabkaiga dabarki ikadaey, sababti ghalabko âd ulusah wan oineyey taabkis hostis, gortasse waikadaey. Wahas ban

kuyahey, sahabtis amurtan okaleh umrigaigi weli ma arkin. Sas way okor an ilalinevey (haddan kas velin waissrebi waivey) Sadeh Ghof oâduîfeyen waidowaden. Midko waimaragh bahey :— Dembigaga odan walasamahev; mid kaleh dararkaiga olakujehjehev waikafurey, waisiyev mar odan ishini waarkeysan oteraf leh; ki sadehad alamaddan olaarka folkaiga wasarev, khutkan omahurleh isivey (sas way wahasyiri olabtis khutkan ukahihiyey.) Ibâdad :— Sâ wah kabadan arki mavsid? Kristan :— Wihi ban eidinku shegey wa sâ wanaksan; ilowse wah kaleh ban arkey, odahdodha sadeh ban ghof arkev magaodha Doghon iyo Ajis iyo Amar wein wajifen mel jidki an modayey âdfog maaha, lugaha kuhidan ahayen silsilad obireh. Ilowse miad umalaysa inan utosi karey? Maya! Haddana ban arkey Ki-din-aleshedha-kughobta iyoKi-wajigis-helad-ah jidki hussunkis ayfulen kasodaen sidi issfanen oSahyoun inay kutegayan; ilowse dukso wadumen sidi ban ushegey:"Wa dumaysan," ilowse rumaisan wadidan. Shughulse âdadeg sidi ban arkey oburtan lafulaya iyo sidi okaleh inan libho [libahyo] afkodha la modayo; Run way ohadan ninkas wanaksanah Bawwabki oiriddi kujoga aniga itoso dabainla omeshas lagarey inanan gadal noghon laha; imintanse Ilahi ban mahad nagha mehan angarev, omahad ban idinkunagha sababtis idowaysen. Kas dambeh Mivir wajeelatev inay wihi odaur uwaraisato jawabkisna sa donevsey. Mivir:— Mianad hususata mar mar dulkas oadkabahatey? Kristan:—Ha! ilowse sas eb oneeban leh. Hadan dulkas oaniga kabahey jeel hususado shô ban kari laha inan kunoghodo; haddanse ban donaya dulkas dul kafian olrkuah Mivir:— Mianad wihi ohaggas adkughoban ogahaid gharkodha weli kaghobin? Kristan:— Ha! ilowse dorkaiga âd kala mid leh; okhaseh wihi ghulbigi lafirsadev iman laan okorki leh, ainkas okurahaisaden rer dulkaigi damantodha ivo aniga rahaisadev. Imintise wihi

odan ainkas dib asiyelaya ohadan wihi dorkaiga ah waheleya wan dori laha fikir kodha weliba imagelayo; ilowse inti wah âdfareed subi dona wah uguhun wailajiraya. Miyir:— Mianad aragta inti gor walakaghadey owihi intigo gor ekaleh kuweireirinaya? Kristan:— Ha! ilowse in yer gor wahas layeley; iminse kasta âdghuroh way owah ainkas inoghonaya. Miyir:— Maha hususatey maha lasubi kara in wihi kuweireirinayan marmar lakaghada? Kristo-leh:— Ha! gorti an hususta owihi gedki saleebeh meshis waarkey, walasubi; gortina marodaiga oterafleh ban ega, walasubi; ghorin khutkiah olabtaidha lahela, walasubi; gortina meshi ban sotegaya fikirkedha aloshaidha hog-ugeliya, sas walasubi. Miyir:— Mahana wa geley aloshadha osidi oâd urabta bihid inti Burti Sahyoun? Kristan:— Haggas ban filinaya Usagu nol anarko ki gedki saleebeh kalaladeyey owadintey; haggasna sugninahai wihi odan iwarerinaya tan iyo manta inay kadafi dono: meshas walahadlaya dimasho ma lehyahai, meshasna dad ainkas ugujeelahai iyo aniga lafadisaneyna. Hadi ban runta shego, wan jeel ahai Isaga sababtis ghalabkaiga wa ikafurey Isaga, ka dâlan ahai oudur ghulbigaigi dahdis laghoba. Wan jeelan ahain laha meshas odimasho weli ban ma arkayo, isslajirna aniga iyo ollkas owelighodha wa ghailiyan:— Ghudus eh, ghudus eh, ghudus eh. Kolkas Jeel Kristan wa ushegtey:—Ma ilmo ghabta, ma nag ghabta? Kristo-leh:— Nag wa ghoba iyo ilmo afar oyer waghoba Jeel:— Bal mahad ulakeni weysey? Kristan ba wa oiyey wahasyiri:— Ad anurabey an lakeno, ilowse iyaga odan wadiden omaanahodha damantis "Ha kutegin adiga hajkas". Jeel:— Adigase kuwajibeh adluwarrantid, adusharibto ufirinayso hadi wadambayan sidi shilkis laha. Kristo-leh:— Sas ban kusubiyey; wanushegey side Ilahi itusey beledkaini walahallayo, wahay moden hadalkaiga sidi ki ghosoleya leh, wairumaisan

waiyen. Jeel :— Ma Ilahi ba ubaritey shaurkaga wahi adusisey inu kubarakayo ? Kristan :— Ha ! wan aloshi ukubariyey sababtis run way âd ban ujeeladey nagtaiga iyo ilmiyashaiga maskina.

Jeel :— Mase ushegtey alolhumada neftaga okughobtey, oside absatey lakuduminayo ? Sababti, ban umalaya, in ainkas lakuduminayo dahiran adaragtey adiga. Kristan :— Ha ! wahas damantis mar obadan anuwarramey ; haddana absigi folkaiga waarki karen ilmoinkaigana sababtodha haddana sidi an kharkharey hukunki sababtis odayar in nagadao. Ilowse amartan odan mau filan in usasabayo oilaraayan. Jeel :— Mahase sababah wasiyen oimasho wadiden ? Kristan :— Wahas onagtaiga wa absatey duniaddan afrahedha okhasaraeh, ilmihaiga isswalwalki odalanah wajeeladen ; sas osas ba sabab wanoghodey oigadafen osidi keligaiga an safaraya. Jeel :— Mianadse halleyin warrankaga sasabnintis oulakaleysey dahdedha sababti soodkaga naftaga wanaksan maaha ? Kristo-leh :— Soodkaiga run way ma issfani karo, wa ogahai wah badan an gufey dahdis. Haddana wa aghan ninko oinu dad kaleh wahma otara ghulbigodha kugeliyo washeriba hadal iyo sasabakis kusheriba, dukso hallein kara soodki neftis sababtis. Wahanse washegi kara wan âdissdhauradey sabab inanan kusin ofalninkaiga fareed maaha sababtis oiyaga hajkan onololeh wa didayan, owahan ishegen inan âdisseliyey issdideyna sababtodha iyaga wihi halaleh ohisabayen neftodha.

Wan umalaya hadi wah iarken olueliyey wakan way inan âdabsidey llahi an asinayo, iyo diriskaiga wahma an uhuminayo.

Jeel :— Kain run way walalkis wanaey sababti falninoha neftis wa huneh walalkis wa hagh eh ; nagtaga iyo ilmahaga hadi sababtan eh kuneban ahayen wa dhahiran way iyaga wah oron ah jeelan waiyan ; adigana digkodha hujadkis waisskafakisey.

Riyodkaiga ban arkey sas isslahadlaven inti hungurigi tayar aha; kolkeyna waladigey waisskufadisaden, hunguri launaya omezanki hilib badan baruıah iyo khamri âdfian walaha; iminkina ayunayen wah odan olahadlaven burti Ebbihis wa lehaha; wa sidan way ainki hadalkodha wihi bu subiyey Isaga iyo shughulkis jiriddis iyo muhu oaghalkas kudisey; hadalkodhana ban kukasey inu kolki hore wahog odagalleh wagaraey ki dimashodi hoggedha leh, wudilev, ilowse hore khattar wein walogelinev, wahan sababtis kabadan ban ujeeladey.

Sababti sidi ayshegen oaghalki dadkis sidina wan moda in Kristan wa shegey daraddas dîg badan wukughubev. Ilowse wihi dan bu yeley onima amantedha walaha sababtis waveley odulki beledkis jeel ughoubeyey. Haddana dad aghalki intodha washegen :— "Wannu uaragney ukulahadalney markan saleebki odintey dambigis; marghati wakenen wahas yirahen :— Isaga neftis warrantis wamaghalney inu dad ohajinavan odan-daranah sidi jeel yahai omisilkis lamahelayo mashrik inti mughrib. Wahanna bay shegen warrantas olehyahai: Isaga kuwi dan-daran ah daraddodha inu sas ukusubiyo amantis isskaghawinev; haddana degtaina wasodaradey "Burti Sahyoun ollin ban ma jeel ahado okeligaiga", haddana washegen :— Kuwi hajinayan obadan omel dagag ah wa ludaley asilkodha owa lokaghadey meshi fanto leh boghorval udigey Isaga. Sidi aykukhodhen inti awadi badan kunoghodey, dambigas oEbbihodha ilalihis tukasho wa issudegen kalasitegen hurdo. Way geyyen ki hajinavey gholad wein usiven khalfaddi ojideysev meshi ghorahdu kabaheysa. Gholaddas magahedha "Nebad" way. Isagana inti waga askabario bu jiftey; wakaey wahesey :— Inte iminka aniga

O! waajaibah<br>
Jesu jeelhis<br>
Ivo fadhilhis<br>
Haji walosiya

Oaniga dembigaiga ikaghadey; Sahyoun deriskis leiďowey.

Subihi wakaen oďan; hadal in kabadan dabadedha iyaga waushegen:— Hakein kubari karna, intian wa kutusney meshan khasanaddohedha. Hortena wa ugeyyen gholki okutubleh; haggas wihi beriyihi uguhore laďigey utusen; kuwi dahdodha osidi riyodkaiga ban husustey horta utusen burti Ebbihedha abtirsinyihis, olsaga inu Ki-Had-Iyo-Gor Inahis way, ďalnintas odayimah wa noghodey. Haďdana haggan wihi gesiah wasubiey warkodha kabadan oidil kulaďigey; iyo boghol badan ďad radisodis ohub-ghad ah loaghbaley magaodha; walowarramey bu usoďowey mid kasta meshi ainkedha weligai lamaidlayo iyo wahba ma dao.

Haddai bay uakhrien falninti intedha ogesiah walasubiey Ebbihi adonadis wasubien; sidi way omulkiyal walahoseyey, hagh lausubiey, wihi ballan ah walaheley, libah afkodha walakaeliey, dabki hogkis walademiey, sefki afkis kabahsaden, hog wein unoghoden owà hore dad weïdsan ah, ollki dahdis gesieh wanoghoden, ollyashi omartieh wafirďien.

Haďdana baadigas bay akhrien aghalki warkis owihi mel kaleh walaghorey dahdodha idma dad inay Ebbihodha nahadintis agtedha waloakhbali kara, side rali ukusubiyey Isagu id kasta okuwi Naftis iyo wihi hagajiskis wà hore ai badan kuyelen. Mehanna war kaleh way obadan okuwi wah kaleh obadan oamanah dahdodha walaghorey, Kristanna ďamantodha wah bu arkayey; sidi owihi ki wàgi hore leh iyo waggan leh, sas way owah bila shak ladameytiri doney ohore lashegeyey owihi weinah iyo wihi yerah, odahdodha kuwi adow ah absi iyo nahan waarki lahaiyen kuwina haji ah ghobo oraha kuarki lahaiyen.

Berridi wawaden aghal ayugeyyen oghalab kujira silahah, wihi oain walba wautusen kuwi hajinayan Ebbehodha tayar wa kudigey osababtodha sidi sef iyo gashan iyo ghofiad iyo ghalab obirreh labti lagelinaya iyo tukasho idil iyo kabo lamayaraya. Wihi ba mehas waladigey dad Ebbehodha shughulkis kuadegayan waufili laha odadkas hedigo oirka leh kaleh obadan.

Haddana wautusen àlàto gharkodha, in wah ajaibeh wakusubiyen Ebbehu adonadis gharkodha; wautusen Nebbi Mousa ushis, iyo dubbaihi o musmar bay kuadegisey Yael iminki ayudishey Sisera, iyo ashunyal sunfarona musbahona oaskuadegtey Gideon iminki àdburiey Midian ollyalkodha, iyo ushi aradeh ololeh oShamgar dahdedha leh boghol nin wakudiley iyo lafti daneh oSamson wihi ajaib sidi hog ah dahdedha wakusubiyey, iyo wadafki dagahina askuadegey Daoud iminki asdiley Goliath oGathleh, haddana sefti askuadegi dona Ebbihodha iminki ninki odambileh wadilaya, berigas olsaga inu bobki kughobo watosaya. Haddana wautusen wah badan oàdfian, Kristan ba àdaskuafrahey. Sidi odamaisaden, gor kaleh wajifsaden. Wan arkey subihi Kristan wakaey tayar asaha inu assafro ; iyagase ayyinahden :— Wa kubarina adlafadiso agtaini inti berri ohadi darur anlahain wakutuseyna Burihi ofarahsan leh, sas oadiga faraj àdkuheleysa osababeh burohas meshan ohaddan kujireysa kadow tahai hajki damantis oladona. Bal akhbaley wafadistey. Kolkey dirarti badan way inti aghalki korkis wa ukenayen, wafalen inu barki kuseh ilaliyo ; sas wasubiey oilali ! fog badan waarkey dulko ugufianeh oburoleh, melmel ghurohsan kuwi odududah iyo kuwi zabeeb leh, iyo inte gedo omiroleh wah walba kuyal, iyo bahaiyal iyo elel iyo durduro, wahas odan ki laarki laha jeel wanoghodo.

Kristan wawarsadey ďulkan magais maha way? Waujawaben:— Kan wav biladki Immanuel leh; haggasna sidi okaleh burtan korkedha haji kasta waloidma inu wihi oďan kufarhio. Halkasna kolkey adgarato waarki kareysa inti Beled Irkueh iriddis, osidas dadki oiďi raayan halkas okufaďinayan wakutusayan.

Haďdan fikrigis inu safr kujedo, iyagana wa shegen:— Wannu akhbalna ilowse hore meshi ghalab osilahah leh an tagno. Wa tegen iminkina ogaďnintis haggas ghalab ki lasheribey ohogah áduadkaien madahhis iyo lugtis ayusaren, sô jidki dahdis wihi lokawerareya.

Sas wav oghalabki walogeliey usiga iyo waďeyogis inti iriddi wasooden; haggas Bawwabki bu warsadey:— Ma in dad ohaji ah waaragtey oaymarayen? Bawwabki wa warsadey:— Ha! Kristan:— Ma utaghan oya way?

Bawwabki:— Magais ban warsadev, isaga waishegey: "Ki-dar-ghoba" magaaiga way. Kristan:— Waiyei? aniga ban uaghan, beledko annu lafaďina: Deris oagtaida way, isaga wa mehi anlaďalev leh. Inte umalaisa wafogvahai okahormarey? Bawwabki:— Wág kan burti hostedha wagaďey.

Kristan Bal Ilahi ha kulaghobto, Bawwabki yehey owanaksan ah! Ilahi hakudaro okhairkaga korkodha inu kubadnayo ihsankaga oagtaiga wa subisey. Sas ojidkis wahormarayey; ilowse Favig iyo Ibadad ivo Jeel iyo Miyir waraben oulasoodayen inti burti hostedha; walategen warran wihi hore walahadlayen hadyo inti degnin bilowgedha. Kristan ba shegey:— Sidi okorta lafuley ďibleh, sidas ohosta ladega shilleh. Miyir:— Ha! run way; sababtis adeg way degnin oďohoshi Hosaisis leh sidi oadiga iminki adkadegevsa osisib wahba laantedha. Sababtas annagu wakusoodaneyna inti burti hostedha. Wa bilabey dego ilowse àdfirsadey, sas ogorto ama laba gor sisib waghobey. Riyodkaiga dahdis ban arkey oklkey burti hostedha isaga kagaďey, waďeyohis fianah kibisko usiyyen iyo garurad khamrileh iyo armo ingegenah; jidkisna bu isskategey.

Haddanse Bohoshi "Hosaisis" dahdedha Kristan shughul adeg bu arkey, sidi ayan bu heley, sababti ojid yer keliah wa tegey wa ilaliyey ifridko âdhun odohadi dahedha katalabeyey lakulaneyey iyo isaga magais way Apollyon. Kristan ba absi wabilabey, wa shaurey ghulbigis :— Senyala? Ma galal an noghode iyo tâgan an adkaisade? Wahusustey dushis silah lamagelinin, wa umalayey hadan dibada ujesanayo ifridki ka haulyari leh ofalladohis waikuduri kari laha. Ghulbigis inu sababto waeliey otâgan adkaisado, fikrigisna way hadanan wah kaleh fikrin noloshaiga bihid mahe uguron oan jogsan laha. Bal hortegey Apollyon waisskulmey iyo isaga. Ifridkina midibkis ishi walanaey; khub sidi malay walaguntiey, sababtas bu issfalinayey; balna waghobey sidi mas odula; agohis sidi odub waleha; aloshis dab iyo khikh wakabihiyey; afkis sidi libah way. Kolkey bu udowadey Kristan yikhyikhsi uilaliey, sas bilabey ouwarsadey :— Adiga inted katimid inted kategeysa? Kristan :— Wahan kabahey Beledki Ki-hallawaya, omeshi way wah hun odan leh, wa tegeya Beledki Sahyoun. Ap :— Sas asyahai oban kuarkaya dadkaiga midko adtahai; sababti dulkas damantis aniga leh, dolohis iyo ilahihis aniga. Mahai layeley oad'ga boghorkaga ror oduman kadaftey? Hadanan sugnin ban ghobo inad weli iadegi laha, nabarko haddan hos kugadili laha. Kristan :— Mulkigaga, run way, ankudashey ilowse adonimadaga khakhan aha; mashaharana dad adusineysey hungurigis mauderginin; sababti mashahara dembileh dimasho way; haddaba kolkey nin weyn annoghodey wahan isskudigey dadki gharkis oaghli leh, wabilabey fikr side ankuhelo hal kale wah iron kabadnain laha. Ap. :— Ninna odoloeh ma akhbalayo raiyadis sidi ohaulyari ulumiyo anigana weli ma akhbalayo inan kulumiyo adiga; ilowse sababti gar bad ushegeysa adegnimodaga iyo mashaharaga rali aho in kunoghoto,

anigana meshan waballana kusiyo ainka kubihi kara dulkaini. Kristan :— Anigase ahadi wa ghobey dolo kaleh agtis odoloyal doladodha inan uadego ; side ohaghleh hadan adiga lasinoghodo ? Ap. :— Sidad yashey sidi asyidi misilki :— "wah kahun wah hun addafsatey." Ilowse wanoghoda kuwi wa ghiraden inay Isaga adonadis way ghar ugubadan inay Isaga duman ukadafan, aniga agtaiga wakunoghodan. Wa nogho adiga haddana sas layelo hal fian odan adheleysa. Kristan :— Aniga wa ahadi ghadey Isaga agtis ; inan uhosaya ban dartev ; sen wahas ban kadafi kara, mianan sababtas oki ahdigi Dologis agtis wa naaya, geridis gedki khortaiga kukalalado ? Ap. :— Sas way oadiga adiyeshey aniga, anigase rali ban ahai osamihi dona odan, hadi haddan sojesato hadi unoghoto. Kristan :— Ahadi an ghadey ankuadego adiga, iminki an yer aha : haddana amanaisa in Dolada obunderadis hostis wa jogsada kaibihi kara ahadas, haddana iaffi kara wihi ba omrigaga issoggolan lakusubiey. Haddana Apollyon O ! ki rognin leh, orun ban shega, sidi ban arka aniga, adegnimaddis iyo mashaharaddis iyo kuwi uadegayan iyo mulkis iyo inan Usiga lajogo iyo dulkis kuwas oadiga leh ka ron way. Sababtas haddan isasabnin abso ! Aniga adeggis (adonkis) way, oaniga wa uraaya Usiga. Ap :— Ad firso odîggaga wa ghabow ah, dibki sas way kughobi dona, jidki admodeysa. Wa ogtahai kuwi uadegayan ugubadan sî hun kudintan sababtis iyaga aniga iyo tosnadkaiga lagaambiya. Side obadan wahay geri ebeh wahelen ! Okaleh wamotey kuwi uadegayan adeggodha kuwi aniga uadegayan adegodha karon, oIsaga weli ma kayimid, mehas asjiraya, halko dadleh ouadegayan dadkaiga gaantodha kabihinaya. Ilowse aniga sidi duniada odan waogyahai side gor badan ama hog ama bein kuwi iadegayan Isaga iyo dadkis wa kagubihiyey wahas ohadi dad hog waloghobtey ; osidi ankagubihi adiga.

Kristan :— Ukabihnin haddan bu dafaya ; wahas osababtedha inu jeelkodha kusheribo ohadi waghobayan ointi kadamanayan ; geridasna ohunleh wahelayan kas wah âdaman—leh sidi aymodan iyaga. Iyaga ba haddan salamad kalabihi mâd ilalinayan ; sababtis amantodha aysugayan ; wa ayhelayan, kolkas imanava Dolagodha oamanti Usiga iyo malaika lokuamanaya. Ap.:- Gorti wa ka naatey ahdigi inad Isaga uadegayso, mahad ba ufirsata inu mashaharad kusinayo ? Kristan :— Side wah ban kunaey ahdigaiga agtis ? adiga O ! Apollyon ah ! Ap. :— Jidki okasootey horantis waweidotey, kolkey abudan wa dowatey warti Ti-damaa-kagoisa. Wa sheribtey sidkaga lakaghado ojididki halalla, owajib way adsugtid Dolagaga intis wa kaghadey Isaga. Wa geftey osehatev, wa lumisey wihi fareedah waghobatev. Waladowey olasasabey inad sonoghoto galal olibahyodi adkuaragtey. Gor kasta safarkaga warkis ad shegtide iyo wahad wamagashey iyo waaragtey aloshi warabta lakuguamano wah odan oshegeysa ofaleysa. Kristan:- Hadalkas oidil run way, haddana wah badan omaadshegin, ilowse Dolagi ouadegaya ouhishmeinaya wanaharisleh orali in samahayo. Sas asyahai ohaddana wahan odan oweïd ah dulkaga dahdis wa ighobayen, mehas mehi leikunujiey wahan ouleiskodha ban kutahey osababtodha tobad wa keney oDolagaiga affigis wa akhbaley.

Kolkas Apollyon adow âd diran ah kukabahey wahasyiri :— Aniga Dolagan adow an uahai, Usiga Naftis ban naa iyo amrihis odan iyo dadkis ; sababtas wakuimid inan kuilo. Kristan :— Apollyon, O ! isskajir falnintaga ! Aniga jidki Suldanki-leh jidki ghudus leh ban raa ; sababtas adiga naftaga issilali !

Kolkas Apollyon jidki korkis âduhorey wahasyiri :— Aniga absi laan amrigan. Adiga ḋimasho tayyar aho! wan ḋartey godkaiga oJehannam leh takodo ma tegeyso mehan omehanah ruhaga kadadinaya. —Sas way ofallaḋ odab eh Kristan labtis bu kuridey ; ilowse Kristan waujogsadey gashan gaantis, askuhaistey, khattar onabarah waeliey.

Kolkasna Kristan seiftis wa kabihiyey, sababtis wakasey haḋdan odukso lazim wah falo ; Apollyon ba sidi okaleh ukubodeyey isaga, fallaḋ badan kurideyey sidi rob odagah ah ; Kristan ba wah oḋan bu kari karey wakuelinayey, ilowse jidkas madahi iyo gaanti iyo agti nabar ukuyeley. Sababtas Kristan wah yer kaweïdobeyey ; haḋdaba Apollyon âdissharbiyey, Kristan ba ghulbigis ghabojiney sidi karey gesiah wa eliyey. Sas odireh isskudilayen malin barkis kabadan, tan iyo Kristan hoggis âddowadey ḋamado. Sas noghodey tawarhis bu waweïdobayey gor walba jirohis sababtodha.

Apollyonna wahas modey; haḋdai wauḋowadey waheley waghobtey hog dulki âd ukuridey, oKristan seiftis gaantis wa kadaey. Apollyon washegey:— "Haḋdan wa kudila warran maleh" ; oyer mahe ḋimasho âdasughobtey ; Kristan ba bilabey inu nolan damaahedha kaḋafayo. Ilowse osidi way Ilahi jeelantis, gorti Apollyon nabarko keliah oweli luguḋamaya ninkas ofareed eh korkis Kristan dukso kabihiyey gaantis seifkis bu heley, washegey :— "Ha iafrahin, korkaiga adiga adowgaiga yehey! gorti ankudao gortas anjogsanaya" ; gortasna seiftis wakudhurey sidi ki nafta kudilayey Apollyon galal lorid ey ki nabar kuḋinsan ah uekaha. Kristan ohalkis bu arkey gor labad uroreyey oshegey :— Run way amartan ḋamantodha dahdodha kuwi dagal ka adkanahayan ka ron innagu Isaga dahdis onojeeladey. Iminkas Apollyon balalkis osidi mas dula leh isskalajidey, dukso kabahey, oKristan weli umaarkin. Nin ankuarkin ankumaghlin sidi aniga ma kasi kara sidi ohun Apollyon ughailiey, ujibadey

iminti oḋan isaga iyo Kristo-leh ayissdilayen. Odkis sidi mas dula way; sas way lamakasi kara wihi sidi oin ah otah ah Kristan ghulbigis âdkabihiyey. Aniga ma arko wajigis owah ba afrahsan ah abbarko keliah ogor walba dahdedha inti askukasey seiftis olaba gabal goieysa wakujerasiyey Apollyon; iminkas,run way amus ughosoley, kor uilaliey. Ilowse dagalkas kaâddireh noloshaiga ban arkey.

Dirirti baadigedha Kristan wahasyiri:— Mehan mahad unagha Isaga Ki ikatosiey libaha afkis, Ki ikalmiey iminki oaniga iyo Apollyon anissfaleyney.

## GABAI

Dambeh gaan ayubahey ged onolanti weligedha alentis aysiyey. Wa ghatey wah mariey jeroha ollki askuheley korkodha, iminki wa fiowadey. Haḋdana haggan faḋisadey inu in kibiski wauno kharuraddi kaabo wihi losiyey wahyer ohore. Sidas waghabobey, safarad wabilabey ohaḋdan saiftis gaantis askughobtey; sababtis washegey:— Ma kaso hadi dad kaleh oadow eh jidki jogan. Ilowse ma issarkin isaga iyo Apollyon sidi okaleh ugâdaya meshas oḋan oboholah.

Bohoshas (Banankas) ba galashedha bohol kaleh kadambeyey magaedha Bohoshi 'Dimasho Hostedha (Haḋkedha) Kristanna wajibah mehas asmodo, sababti jidki Beled Irkuah dahdedha wamarey. Bohoshan ba mel âdgoniah way: nebigi Yeremiah sas jinsigedha wabayyiney:— "Gelgel dul goniah ogudgud eh, dul omanleh o'Dimasho 'Haḋkedha leh, dul odahdis ninna [nin oKristan ah mahe] ma maro, odahdedha ninna ma faḋiya.

Mehanna Kristan sidi lohumaiyey ohalkis ohaggan halkis iminki isaga iyo Apollyon wa issḋiriden kahun way; sidi adarkeysa haḋdo. Ruhyodkaiga ban arkey okolkey Kristan wagaḋey meha osohinta Bohol 'Dimasho Haḋkedha laba nin isskuhorey imid (orerkodh osilkis)

oilmoah kuwi ilaloah owar hun aysokenayen kolki hore dulkas ofianeh, labadan ba ayunoghodan oror; Kristan waushegey :— Inte tegeysan? Washegen :— Wa noghoneyna, wa noghoneyna wahanna rabna adiga isslanoghosho hadad nolanıadha iyo nabad âdrabto Kristan :— Mahaise jira? Nimanki :— "Mahai jira" bad shegtey? Jidkas oadtegeysa, anunki wategeyney. Tan iyo âd absi aha sohintis wategney; waudowaney nefastaini noghon wadumiey. Sababtis hadi hor oyer an tegan, inta ma jogi lahain war ankukeni lahain.

Kristan :— Idinkase iyo mahad waisskuarorten?

Niman :— Annuga ba wakudowaney inan ugelno Bohoshi 'Dimasho Hadkedna. Ilowse nasabkaini hor an ilaliney shilki hore lagadey waaragney. Kristan :— Mahase wa aragten? Niman :— Wa aragney bohoshi neftedha sidi wah âdmadow mugdieh: haddana haggas kuaragney dad godki Jehennam leh ojinniyashi iyo jinsigo ifrid eh iyo masaski odula: haddana bohoshas wamagalney dad oin ku haraidinayen iyo ghailighodha uekaden kuwi ilkodha anlashegi karin oayfadien silei iyo bir osilsileh lokuhiden; bohoshasna kor odabolan darurohi way ohagajislaan ah oabsi leh: korkedhana dimasho gor walba balodedha kufirdiya. Halko hadal kas mel way damantedha absi eh, owahba haggajis eh maaha.

Kristan :— Anigase weli ma arkey hadalkini sababtis inan haggas jirin jidkaiga okulagada meshas oladona.

Niman. :— Hadi kan jidkaga way annagu jidkan jidkaini kumadorana.

Sas way oisskalategen, oKristan jidkis wategey, seifkisse gaanti weli kughobtey, oisskadowreyey hadi sho lodiriro.

Ruhyodkaiga ban kuarkey tan iyo bohoshi damantedha ogaanti midig agtis god wajirey adhos kategey·

Hagga ofir walba wakunoghodey dad indala dad kaleh oindala aywaden lakudaen, awinla lahallawen godkas.

Haďdana gaanti bideh wakujirey war dohboah ougushilleh. Nin ba ohadi wanaksan ah, mehan kudao dàf ojognin âgtis leh mahelayo. Wartas dahdedha imin ki horte Suldanki Daoud wakudaey, shak maleh ighsanan laha hadian Usigu oKi kari kara ukabihiyo.

Haďdana meshan marinki âd ugu ďuban oyer (ediďi) way sababtas na ninkas ofian ah Kristan kabadan loweir-weireyey; sababti gorti washeribey gudhurki dahdis godkas obarbarkoah isskadowro, wadowadey obarbarki ki kalen dohbadi dahdedha issugeyyo, haddana warti gorti isskaďowreyey, waďowey godki askudao. Halkas horhor bu ku soodey, wan maghley ohanun ualol-humey; sababtis haggan jidki sidi gudhur eh gor badan olugtis kor asgeyyey hor askubaheyey inte iyo hagge korkis ka dambeh odigninti hagagsanah wa kasi waiyei. Bohoshan sidi baďkedha wahan kuarkey ogodki Jehannam eh afkis wajireyey mel jidki âdoďow. Kristan wa firsadey; Haď-dan senyela? Iminna imin dab iyo khikh sidi obadan kabahey duldul iyo sankhad lanahey (owihi sidi horte Apollvon Kristan seiftis isskaďowrey maaha), Kristan lazim seifti gashedha wageliyo ughado ghalab kaleh magais Tukasho-oBuhsantedha, wa ghailiyey, ban omaghley, "Ebbo yehey! Wan kutuka, nafta'ga salamad usarrahi!" Sidas gor badan wasoodey dabkise arrabyo-dis gor walba inay ugaďan wahaushaden; haďdana bu maghley odod hanuneh iyo san obadan wahas uekahai kuwi daghso dagsho ohagge hagge uorodayen, wahas okolkol wamodey gorto "wa leijehjehinaya" iyo gor "sidi surinki dohbadis wa leikujogsaneya". Wah ainkas bu ar-keyey iyo wihi ainkas bu maghleyey soodki mail iyo mail obadan ďamantodha sas way omel wagaďey oumalayey inu maghley gaďila ifrid ah waisshorimanayen, wajogsa-dey wa firsadey: Senyala ougushilla ah? Kolkol firsan

wabilabey "gadal annoghoda"; ilowse haddana wafirsadey "Sho aniga wa ku gadey bohoshi badkedha." Haddana husustey oshil badan wa kaadkadey; wafirsadey "Hadi an wanoghodo sho noghon hortegnin kabadan oshilleh". Taio aloshis bu kudigey- "Hor antega". Ifaridse, sidi lamodey, gor walba weli wadowanayen. Ilowse kolkey âd udow owerar diman keliah waimaden, isaga hog ugubadan bu ghailiyey washegey :- "Rabb Ilahi hoggis ban kusoon dona". Iyaga ba dib ujogsaden kadow ma imaden.

Hadalko inladafo maaurabo. Ban arkey Kristan osidi ghulbigis dib uwarersan aha osaut neftis kukasi wai; Anigana sidas wa kukasey halkis. Iminkada wa uyimid godki dab Jehannam eh oafki gestis wagadey dadkas ohunah midko galashis wakatagsadey sankhadla hadal badan aïeh oâdhun degtis sasab ukeney, wahasse bu modey in ghulbigi naftis wakabahey. Wah ba odibbleh oidil ki hore wahan kaulus buarkey ofikri keliah inu lddas Neftis ohorte sidi obadan jeel bu keney haddan aî wakenaya. Ilowse hadi wakari karo kas mau yelen, oaghli mau lehin degtis kueliyo iyo inu kaso aïohas inte kategen. Kolkey ba Kristan mudad owah dher wategey halkan ohuzunah wamodey inu maghley od onin hormareyey oshegey :- Hadi an soodo Bohoshi Dimasho Hadkedha wah ba ohunah ma absinayo, sababti oAdiga ilajirta.

Kolkas wa isskarairaiey owihi sababtodha sas way; Hore, ghulbigis wa kasey fikrigan: dad kale oIlahi absanayan aykujiran bohoshi dahdedha, anigana keligaiga maaha. Ki labad, wa garanayey halkas sidi gudhurleh ofarhadla iyaga bay kujirayan, haddanase iyaga Ilahi bu kulajira. Wa fikirey:- mahau omian ikulajirin? owah meshan kuelia, sababtis an ma garo. Ki sadehad, osugnantis bu heley : Hadi an ugadi karo, dad ban helaya haddo oisslasafareyna iyaga iyo aniga. Wa hortegey, ninki ohor

marey âd u yerey ; ninkasse wah ojawwabninti maghobin sababti sidi okaleh isaga wamodey okeligis. Gor dambeh gabbal so bahev. Kristan washegey :— Isagu ḋimasho haḋkedha arorti wasubiey.

Haḋdan ba oarorti yahai wa galal kuilaliey ; wahan wa subiey osababti maaha in noghon warabey ilowse inu malinti bu arko shilo jinsigodha ogudhur ukamodey dahdodha. Bal âdarkey godkas obarkoeh iyo warti dohboeh barki kaleh ; haḋdana side oḋuban yer jidkas odahdodha wa jirey. Iminkana wa arkey jinniyalki iyo jinsjgas ifrid eh iyo masaski odula ogod Jehannam leh, ilowse ḋamantodha mel dher ayjiren. Sababtis owaga wa bariey ma ḋowaden, ilowse walayeley in isaga uarkey sidī laḋigey :- Wihi osir dher ah gudhur kabihiya, ḋimasho haḋkedha iftin ugeliya. Haḋdan Kristan hanun wa yabey ojidki keliah uraey shilodis salamad ukalaghadey. Shilodas horte kabadan bu ku absidey ohaḋdan kadhahir bu arkey sababti gabbal ḋalalki dahdis walaarkey. Kolkasna ghorahdu ḋow sobahayey; wahan haḋdana rahmad ah Kristan uawinayey, sababti orunah oBohoshi 'Dimasho Haḋkedha baḋkedha ki hore wa absilah îlowse baḋkan kilabad ah âd kaabsileh way hadi kas wa jiri karo. Sababti mehas bu jogsadey otan ivo inti bohoshi ḋamantis lagagaḋobarbarko jidki sidi obadan debin iyo shabak wakujiran iyobarbarki ki kaleh sidi obadan god iyo gun ti laḋigey wa jiren, ohadi dudhur weli wa jiro sidi ohorte bihidis dahdis ohadi kun naf ghobo waladumi laha. Ilowse sidi ban shegey haḋdan ghorahdu wa bahayey. Kolkasna bu shegey :- Musbahdis wakuiftina madahaiga korkis, iftinkisna gudhurki dahdis wakumaraya.

Kristan ba isskategey oimadey mel oyer lufuliney, okor latuley wahan sababtis kuwi hajinayan inay horte jidkodha wa arki karan, Mehas ba Kristan wa kufuley, kailaliyey hor Ki-dar-ghoba (Ki Aminah) bu uarkey ohormareyey hajkis. Kristan ba od uyeḋey wahasyiḋi:- War ya! war ya!



BOHOSHI DIMASHO HADKEDHA

'Wa ghaihiyey, ban omaghley, "Ebbo yehey! wan kutuka, naftaiga salamad usarrahi!"'

Riyohdedha wahan kuarkey in holorayashi kolkey ukasen iney dad safarah, haḋdana neftodha in war ah bey uwarsaden. (Labadas wa ujawaben sidi melmel ohore wajawaben.) Wa sidan lawarsadey:— Haggé katimaden? Sidé bad ugeshen jiḋki? Sidé uheshen samir hor usootan? Sababti dadki omeshan imashadedha bilaben in yer ba laarkaya burahan korrkodha. Ilowse holorayashi kolkey jawabahodha aymaghlen olakagufarhiyey bey kuarken wiji ghurohsan ojeeladey, wahey yirahden: — Soḋowada Buroha Ghurohsan!

Holorayashi ba omaghaodha wa "Ilmi" iyo "Aghli" iyo "Ki-ajislaan-egaya" Iyo "Ki-ghulbigis-safi-yahai" gaanta bey uku ghobten buloyashodha bey uḋowayen ûnno okolkas samaisanahaid bey ughaibiyen; wahay yirahden: — Wahan rabna in wah yer halka faḋisatan in sidan nogaratan oweliba wah fian Burohan Ghurohsan lehyihin dahdis tuḋnin kughobtan. Bal labadas wahay yirahden:— Rali ban unahai inannu faḋisano. Sidas kadambey bey tegen onasaden sababti wakhtigas habenki wa badaney.

Riyohdaidhana ban kuarkey in arorti holorayashi sotosien Kristan iyo Ki-firso-fian-buha iney isslasoodan

buraha korrkodha. Kuwan bey issraen wah isslasooden, indahodha bey kuegayen omel walba dal fian bey arkayen.

Holorayashina waisskuyirahden:— Kuwakan ohajinayan mian wihi ajaibah intodha ba in utusna? Kolkeyna wahay ukuheshiyen sidas ayyelan, hore horan eygeyyen burto korrkedha magaedha "Gefleh" ogadashedha garr wayye, wahay yirahden:— Illa hos ega! Wa egen oarken burta hostedha dad badan ogurada hore ukakufen âd ojabjaben. Kristan wahu yiri:— Hajadas mahai tahai? Holorayashi wa warsaden:— Ma maghshen khabarti dadkas logefiyey sababti Hymenaio iyo Fileto alimkodha bey degaisten, aminki okorrki kasonolantis leh bey gefen. Wa warsaden:— Ha! bannu maghalney. Holorayashi wahay yirahden:— Kuwan ohos kuaragten burta agtedha olajebjebiyey dadkas wayye; ma lodugin tan iyo hadda sida oaragten, dalîl wayye dad kaleh daraddodha, haissdauran (haisskaegan) inaney âd burta ufulin ogharkedha âd ugudowin. Gortas ban arkey iney geyyen bur kaleh korrkedha omagaedha "Isskaogho". Wahay yirahden:— Fog kaega! Wakhtigi egen fikrigodha wa arken dad badan hagga iyo hagga kusoonayen ghuburaha dahdodha halkas kujirey. Wa kasen nimankas iney niman indala eyyihin; sababti bey turoturoden ghuburoha korrkodha mar mar sababtina meshas wakabihi waien. Kristan wahuyiri:— Wahas maanhedha mahai tahai?

Holorayashi wahay ujawaben :— Ma anidin arkin mel owah yer buroha hostodha oddo korrkedha lamarayey doho lageliyey gaanti bidehdah jidkan? Wa ujawaben :— Wa aragney. Holorayashi:— Oddas olamarey mur bilowgedha wayye inta Kalladdi Mashakaah âd bey kutoseysa. Kalladan Jabbarki Ki-sugninta-goïnaya wa lehyahai; dadkanna (Haddo holorayashi kuwi ghuburaha dahdodha ojiren gaanti bey kutusen) gor hore hajinayen

sidi haddan idinka, bey safaren bey tegen inti meshas oddi lafula. Sababtina jidki oruneh wa khalafsaney meshas, iney jidkas isskadafan dohaddi iney galan bey dorten. Haggas Jabbarki Ki-sugninta-goinaya wa ughobtey Kalladdi Mashakaah waukuridey. Haggas abbar habiski godah dahdis wa laghobtey, akhirantis indahodha wa kasosarey wa uwattey meshas oghuburaah, bu kadafey iney ila iminkan halkas kuwaregayan, ninki Higmad-leh warkis haladameytiro:— Ninki kugasowaregaya jidki aghli leh wa fadisanayo inte ururayan kuwi dimasho lehdahai. Hadda Kristan iyo Ki-firso-fian-buha waissarken; indahodha biyo badan ba kabahayey, ilowse wah ba shegi mahain holorayashi.

Gortas riyohdaidha ban kuarkey oholorayashi uwatten mel kaleh avgeyyen mel boholah oburto yer dahdi dinaadedha irid wayye. Wey furen iriddi wahay yirahden:— "Gudaha ega!" Gudaha bey egen, ghîgh iyo mughdi bey arken, wa umaleynayen iney maghlen od gagaah sidi dab ah, ohinna dad olaadabaya oïney arkan kibri urkis. Kristan bu yiri :— Wa mahai maanahis? Holorayashi bey yirahden:— Iriddan jid mur ah Jehennam tagaya; kuwi wijigodha kukhaiyanayan jidkan kugelayan dadki ainki Esau haghhi ki horte ladaley leh bey îbiyan, dadki ainki Yudas Ebbehodha kaîbiyan; dadki ainki Iskander injilki ayyan, dadki ainki Anania iyo Safira bein bey shegayan runta gharinayan.

Ki-firso-fian-buha holorayashi wahu kuyiri:— Ban kuarkey dadkas damantodha kuwi hajinayan sidi wijigodha wa mughen osidi annagu hadda. Sas maaha? Holorayashi:— Ha! wa sidas. Haddana mughhas in badan (wakhti der) bey haisaden.

Ki-f.-f.-b. :— Iyaga inti haggé shôw bey gadi karen wakhtigodha osidi ayan hun luguturey?

Holorayashi:— Gharkodha burahan wa hor maren; kuwi kaleh burahan weli maayan garanin.

Hajiyalki waisslahadlayen:— Usigu Ki hog leh inan hog wa ghobno ubarineyno lehnahai. Holorayashi :– Run wayye; haddana kolka hog ghobatan kuadegan lahain dontan. Intan kadambey hajiyalki wahay hor tegi raben, holorayashina tegnintodha kuheshinayen. Bal damantodho wa isslasoonayen meshi buroha akhirkodha. Gortas holorayashi wa isskuyirahden:— Meshan ankatusno hajiyashi albabyashi Beledki Samadah, hadi ba iyaga nadaradkaini (hoghadaini) egi yaghanin. Hajiyashi fikrigodha jeelan bey kuakhbalen. Kuwasna bur der korkedha bey geyyen magaedha "Dhahir", nadaradodha usiyen, ha egene. Arkin bey sheriben, ilowse gaamahodha wa kharkharen sababti hususen wahas oholorayashi akhirtan eytusen. Wahan uêliyey nadhar safi inay nadaraddi ukuarki karan, ilowse wahay umalayen iney arken wah iriddi ueg iyo amanti meshas intedha. Markas kadambey isskategen gabai bey kuhesen; osidas maanahis uegyahai:—

Sidas hadal gharsoneh lamujinaya holorayashi dahdodha wihi dadki kaleh kuligodha walagaghariya, ukalaya holorayashi wah der wah gharson wah sir hadad egi rabtan.

Gorti bey kabahayen, holorayashi midko wah jidki khabarkis usiyey. Midko kaleh wa amriey isskaoghada Ki-wah-sasabaya! Ki sadehad wa amriey:— Ha hurdina dulka gedaha fâl lakugeliey ! Ki afarad wahu yiri:— Amana Allah safarkini korkis ! Iminka riyohdaidha ban kakaey.

Wan sehedey, wan riyohdey mar kaleh, wahan arkey labadas okuwi hajinayen buroha kasodegayen, way raen jidki weyn Beledku ujêda. Burahan ba hostodha odow ah dalki Kibir gaanti bidah bu jira. Dalkas

lagabaha murto ogalgaloan jidki kusoonayen hajiyashi kusodaeysa. Meshas bey isskuhoryimaden mid ḋalin yer ofudfudud, ḋalkas kasobahey, magais "Oghonla" wayye. Kristan wahu kuyiri:— Dalké katimid? Haggé osoota? Oghonla:— Ader, ḋalki leiguḋaley wahas ogaanta bideh ah oḋow, wahan tegaya Beledki Samadah. Kristan :— Ilowse sidé umaleysa inad ugeli karto albabkis? Sababti shôw haggas in ḋib ah kuarki donta.

Wahu yiri:— Geli ban dona sidi dadki fian okaleh ayugelan.

Kristan :— Mahadse ghobta otusi kareysa meshi albabka oyeli kara in albabka daraddodha lagafurayo?

Oghonla :— Ebbehaiga donintis ban aghan, soodkaigana wanaksan ban kusoodey; nin walba wahhis ugudaya. Wan kutukanaya, wan somaya, ushur iyo sadaka wan bihinaya, dalkina neftaidha wan ḋafey daraddi meshas antegaya.

Kristan :— Ilowse somaadgelin albabki eḋiḋiah jidkan bilowgis wayye. Wahad kasogeshey murtas ogalgaloan; sababtas ban kaabsinaya wah kasta isskumaleyso, berigi hesab labihinaya walugueshtakaynaya inad tug tahai iyo ghauleh, olugugelnin beledka bedelkedha.

Oghonla :— Ebbiyashaiga, idinka haggaiga âd bad marti utihin; maan idin aghan: rali ahada dînti ḋalkini inad raatan, anigana dînti ḋalkaiga ban rai dona. Wah oḋan, ban filaya, sifian bu noghonaya (usoonaya). Albabkasna okushegeysan dadki odan duniadda wa ogahayan in meshis iyo ḋalkaini wa kalaḋer yihin. Maan umalain karo ninko keliah ḋalkaini oḋan dahdis inu garado jidki keligis osokahai. Hadise ogyihin hadeyan oghin kas wah ba ḋibeh mayo, sababti wa ghabna mur fianah oghurohsan oausleh sidi oarkeysan, ḋalkaini kabahaysa ugughaban ah ojidki suldanka wa gela.

Kristan kolku arkey inu isaga isskibriyey aghligis, Ki - firso - fi̱an - buẖa ḋegtis bu kuyiri :— Ki doghon ẖalkis karon ninkas ẖalkis. Haḋdana wahu yiri:— Nin doghon ah oskusoonaya, aghligis wa wai, neftis ba nin walba isstusaya inu dogho yahai. Maẖan yeleyna ? waẖ ka badan mian kulahadalna ama iminka miainu kahoraynna isskaḋafna owiẖi luguyiri ha firsade, gortas kadambey an sugno oaragno hadainu waẖ yeryer ugukalman karno ?

Ki - fi̱rso - fian - buẖa wahu hesey : hadalkas oakhbaley iney wah uḋafan, wanose Ilahi haḋdana hestis ugeliyey. Haḋdana wahas yiri :— Mau wanaksan ah, wan umalaya, in waẖ oḋan mar loshego, hadad rali tahai an marno, imin yer kaba̱adi ulahaḋalayno waẖ owaẖ sidi ughadi karaya.

Labadaba ba hore ubaẖen , Oghonla wahu kasodibaso̱odey . Kolkeyna wa ukahormaren waẖ yer wahay mur âd mughdieh aygelen. Haggas nin isskuhorimaden todoba sheydan ninkas todoba ẖaḋig ẖogleh waukuẖiren gadal bey uwaden albabki oburti dina̱edha daẖdedha ki hore arken. Gortas ninkas ofi̱an Kristan wahu bilabey inu kharkharo, sidi okaleh wa uyeley wehelkis, Ki-firso-fi̱an-buẖa. Ilowse gorti sheydamanki ninki kawadayen, Kristan ba egey hadi shôw uyaghan, wahu umalayey inu aha ninko maga̱is Ki-jidka-kasijesada ofaḋiyey beledki "Kafirnimad" maga̱is. Ilowse wijigis mau egi karin sababti madaẖhis bu fororiyey sidi nin tugeh ologhabtey. Kolkuse isaga marey Ki-firso-fi̱an-buẖa inu ego bu ujestey wahu arkey dushis warkhad oluguḋigey "Ki-marag-imankis-beinaya iyo kafirki ki inkar ghoba".

Kristan wahu kuyiri wehelkis:— Haḋdan wa soẖusustey khabarki waẖ nin fi̱an heley meshan ḋow, shekad oleishegey. Ninkas maga̱is "Iman-yer", ilowse nin wanaksan buaha. Wahu faḋiyey beled maga̱is "Sîr-

laan". Hadalkas kan wayye:— Murtan bilowgedha wa gelaya hilin olriddi-Balladah kasobahta magaedha wayye "Hilinti-nin-meyyid-leh" Wa lasiyey magahan sababti hilintan dad badan lugudiley. Ninkan Iman-yer ohaji ah sidi innaga sidi unoghotey haggas bu fadistey osehedey. Haddana imintas sedah ghofod hilinti bey degen olriddi-Balladah kabahta. Tugag wayye ohogh weyn magaodha "Ghulbi-absiah" iyo "Ki-amanadis-anfianain" iyo "Hujad"; walala bey ahayen. Iman-yer bey arken meshi ujifey, hardaf bey ugudowaden. Ninkas fian ba iminkas hurdu kasokaey inu hore usafarayo utosey. Damantodha wa sodowaden amr dirifah bey kuyirahden:— Jogso! Iman-yer ba folkis ad ah issgeddi-yey, mau lahain tâg okudiriro ama okuorodo. Ghulbi--absiah wahu yiri:— „Kishkaga laagta bihi!" Ilowse oisaga ma duksan inu bihiyo (sababti laagtis inu lumiyo mau rabin) gortas Ki-amanadis-anfianain wakuorodey, ninki jaibkis gaantis hog ugeliyey, joniad laagah kasodiftey. Iman-yer wa ghailiyey:— "Tuga, tuga!" Marko Hujad gurun weyn gaanti kuhaisadey madahhis wa ukuduftey, nabarkas dulki kuridey; dîg badan kabahey sidi geri bu noghoneyey. Iminkas odan tugahi wa ag-jogsaden, ilowse akhirkedha wa maghlen dad jidki sooden, wakabaghayen; shôw midko magais "Nimad-weyn" obeledkis "Amana-wanaksan" wa imanaya. Sababtas bey uoroden, ninkas fian inu isskal-mainayo keligis bey katagen. Isaga ba katosey, sidi yeli karo jidku bu soodey. Sidas oshekaddis ban maghley. Ki-f.-f.-b.:— llowse wihi uhaistey odan kaghaden?

Kristan:— Mayya! Meshi joharaddis kamarogmadey. Sidas weli wa haistey. Ilowse sidan maghley khasaradis âd isskuiley. Tugaha ba laagta kuadegan lahaid inti obadaney wakaghaden. Wahas kamaeyanghadin, sidan iri, joharad wayye; haddana wah yer olaagah mel mel uguhadtey. Ilowse tâb kudergeysey inu safarkis kadam-

anayo. Hadina run ban maghley wajib aha inu aloshi daraddedha ûnno jidki kabariyo; sababti joharaddis walodidey inu îbiyo. Ilowse wâgi dambey, safarkis wah ugubadaney wahu kabariyo wahu yelo sidi yeli karo, wah badan bu bâhadey.

Ki-f.-f.-b.:—Ilowse ma wah yab ah inaney kaghadin khatkis oBeled Samadah kugeli lahai? Kristan:— Run wayye kas wa yab. Ilowse ma helen. llowse sabab oisaga aghli badan leh wahba umaaha. Sababti iminki kuwas uimaden, sidi unahey tabar ma lahain aghlina ma lahain inusan wahba isskughari karin. Wahas ba ofian kabadan rahmaddi Ilahi daraddedha wah isaga uyeley daraddis iney helan wa waien. Ki-f.-f.-b.:— Ilowse faraj bu arki laha ojoharadis ka ma eyin ghadin.

Kristan:— Hadu kuadego sidi ku hagh ahaid, faraj weyn bu noghon lahai, kuwanse akhbarti ishegen wahay iyirahder:— Wahu fayido yar farajkas kughabaneyey tan iyo inti safarkis okadameyey, owahas nahadintas sababtedha omalkis lagahogey.

Wayye wa hilmamey wah kabadan otan iyo inti safarkis kadameyey; haddana kolku sohusustey ofaraj bilabey neberko laagtis khasaradedha gor labad wasohusustey, fikiryashas farajki damantis ulighey.

Ki.-f.-f.-b.:-- Senyalah! Isaga sidé maskin, shaki maleh, dib badan sababtas bukuarkey.

Kristan:— Run wayye, dib bu arkey. So halkaini lamaeglahain mia, hadi lainnakahogiyo ojeraha lanakudifado mel ainu marti kunahai sidi isaga? Maskin!. Yab wayye il osanudiman. Wahan maghley inu wâgi dambey safarki wah ugubadaney baror ghulubsan ogadad keliah kufirdiyey, ohaddana dadka odan ugarey ama eygaren jidka wahu yiri meshi lagahogey, sidé logahogey, kuwi kahogen ye yihin, maha khasartey, sidé nabar kugarey oïnu dib nolol ah bu kubahsadey.

K.-f.-f.-b.:— Ilowse yab wayye in ayan-humadis dahdedha joharaddis gharkodha ma ghadin ama rahan ma ďibin jidki jisinkis ukahelo.

Kristan:— Adiga wahad tiri sidi dorada ilmihedha uegtahai otan iyo manta in yar ougahha lajebjebiyey madahhis lamagadegin. Maha daraddedha urahan kuďigi laha? Dalkas odan haggas logahogey joharaddis wah ba lomamaleynin iney wah tahai. Haďdana farajkas anu rabin oainki haggas wa heli karey. Haďdana hadu joharaddi laarkin Beledki Samadah iriddis hortedha, walodidi laha dahalko gudaha; wahas âd bu uoghey. Wa halkas kahuman laha halki ohadi lafiriyo toban kun otugah eykahorimadan okahogan.

Ki.-f.-f.-b.:— Mahad ijawabeysa jawab sidi odirifah? walalkai O! Esau wahu haghhi ûradnimo wa îbiey ûnnado osor ah sababtedha, owahas haghhis wa isaga joharaddis ouguthamanleh. Usigana hadi sidas uyeley, mahu Iman-yer sidas okaleh ruksad lomasin karin?

Kristan:— Run wayye Esau ûradnimaddi uîbiyey, haďdana dadna badan sidas bay yelan ojidkas baraka weynah isskudidayan sidi ninkas oasieh okaleh. Ilowse wajib umalaynaysa Esau iyo Iman-yerain kodha isskumid maaha, haďdana halkodha; Esau oûradnimaddis bu egyahai sir ebed ah anlaarkin. Iman-yerse joharaddis sidas okaleh maahain. Esau aloshis ba uilahihis ah, ilowse Iman-yer aloshis ilahihis umaahain. Esau sababti korrkis inubâhey walomaleyna, Iman-yer sas maaha. Haďda wahan inu korrki damaahis kuďergo dushisi ma uarki karo, owahu yiri:— Ruhigaiga wa âd uďow yahai inan ďimanayo, haghhi ûradnimadaidha mahaiigutaraya? Ilowse Iman-yer wa ghaibtis ahaid inu iman yer lahado, imankis yerah sababtis ghasaraddi osas ah wa logahais-

tey, walayeley inu wihi joharaddis ainkodha orunah gana-adodha obadanah wa arko haisigodha wa dama jeelado oinusan îbin sidas oEsau haghhi ûradnimaddis uîbiyey. Wahba Kitabki ma akhriso inu Esau wah yer keliah oimanah ulaha. Yab maaha hadi nin odahdis korrkis jeel keligis issutâlinayo (osidas wayye hadi iman wah kaélin kara ghulbigis kumajiro) hadi ninkas haghhi ûradnimaddis iyo naftis iyo wihi ulehyahai odan uîbiyo, okaîbiyo sheydankas oJehannum leh. Halkis dad ainkas ah wa sidi damerki omarku wah rabo lamagedin karo. Dadkas hadi wihi damaahodha bey raîban, wadâlayan iney kahelan hadi wah kasta iney ibiyan lehyihin. Ilowse Iman-yer ainkas maahain; wihi Ilahi ulehyahai uegey; noloshis wihi Ruho iyo Samad (Irku) leh walosabbarey. Maha ba daraddis nin osidas neaddis eytahai joharaddis wa îbin laha (oid oainkas kaîbsan lahaid hadi ba jiran), wah obâtilah ghulbigis kabuhin laha? Ma ninko laba besa bihiya inu aus engegen aloshis kabuhiyo mase miad gholeh sasabi karta iney wah baghti ah sidi hâdda? Kuwan ba iman ma ghaban wihi korrki damaahis sabab-todha holahodha haddana neftodha rahan digayan ama warkhad muhurkodha bey sinayan korkodha ama îbiyan; ilowse hadi iman, imankas ba o salamad geynaya, lahaisado owah yer keliah wayye, dad oainkas ah sidas ma yeli karan. Wahas, walalkai, O! adiga ba kugeftey. Ki-f.-f.-b.:— Inan gefey wa ghiranaya, wahadse oja-wabkaga sidatan odidanah bad dowaid inad ghulbigaiga kuhumaiso. Kristan:— Anigase wahan keligis ban issuguegey oshimbira oâd dukso ogyihin hore iyo gadal mura weli ayan garanin omarin kuorodayan ougah madahhodha weli ma kadegin:— wahasse isskadaf, hadalkana ainu isskuhadalayna ad ufirsatide owah kasta ainu kuheshinayna.

Ki-f.-f.-b.— Ilowse Kristan O! ghulbigaiga ban arkaya sedahadan ghofod iney damantodha wa fuleiyal. Hadi an sas ahain ma umalaineysa iney rori lahaden sidi yelen okhabkhab eymaghlayen mid jidka kasosooda? Iman-yer ba mahu ghulbigis kabadan uadkein waiey? Wan umalaya inu bilowgi dagalko bu adkein karey, ha dafo gorti wahba usan yeli karin. Kristan: — Nimankas iney wa fuleiyal dad badan bey yirahden ilowse gorti losheribey dad yer ba sidan uarken. Ghulbi gesiah Iman--yer ma ghobin, adigana, walalkaiga, hadi adiga gortas bedelkis isskuhortimadan iyo iyaga, ban garanaya inad dagal marko kelieh issadkein lahaid wahas kadambey ad akhbasho in ladafo. Run wayye ogesinimodas tan iyo wahas kelieh olehtahai gorti iyaga nagafog yihin hadey kusodhahiran adiga sidi okaleh Iman-yer shôw fikir kaleh kugugelin lahayen.

Ilowse haddan wahan garo. Kuwas ijara kelieh bay jidka uhogan, shughulki neftodha maaha. Godka an gun lahain suldankis uadegayan; usagana muhitajkodha hadi kujira dahdis neftis bu lakalman dona oodkis sidi libah uguhaya. Aniga neftaidha sidi okaleh ninkan Iman-yer dagal ighobtey; wahan arkey wah absileh. Sedahatan ohun bey iguboden; marki ohoreyey oaniga sidi ki Kristan ah uisskaélinayey, wa eyghailiyen, marko keliah bey uyeren ebbehodha wa kusodirmey. Noloshaidha ganaadedha wa laba besa, sidi mahmah lugushegey, hadanin leikuhagajin Ilahi, leiguntiyey dar ohubah an laga adkan karin. Sidas ban leiguntiyey ilowse wah kakan ban arkey inan raganimo isskulaharbiyo. Nin ma jiro oharbigi ainkas aha maraggis bu kai kara ki isaga neftis dagalkas jogey mahé.

Ki-f.-f.-b. :- Ilowse wad aragtey wa isskaoroden kolkey fikri kelieh ugeley ghulbigodha in mid magaisNimadweyn jidki sosoodey. Kristan :- Run wayye gor badan wa

rorayen iyaga iyo ebbehodha kolkey dhahir keli lugaarkey Nimad-weyn. Wahan yab maaha sababti usaga Suldanku meshis kaharbinaya. Ilowse, wa umalaya, Iman-yer iyo ki Suldanki meshis kuharbinaya wah kalamid bad arkeysa. Kuwi ba Suldanki raiyadis ah ďamantodha kuwi Usaga meshis kuharbinayan mayanahain oollad ba lugusheribaya mid kasta masubin karo sidi okaleh. Ma in lomalayo lehyahai anug yer inu sidi Daoud Goliath uadkan karo, ama shimbir oaintis âduyer hog leh laarko sidi ďibi? Intas odadah wa hogleh, intas wa tawar yer; intas wa iman weyn, intas wa iman yer. Ninkan wa kuwi tawar yer midkodha sababtasna walogaraayey.

Ki-f.-f.-b. :—Hadi, run wayye,Nimad-weyn wa imado ban jeel aha, dadkas sababtodha.

Kristan :— Hadi bu ahado usaga wah badan oshughul hanun ah shôw bu ghaban kari laha. Sababti ankushega owah âd badan Nimad-weyn wa nin sef--yaghan, dadkasna oseftis aradedha ad fian uguharbin kara, hadise sas noghoto Ghulbi-absiah ama Ki-amana--fianain ama ki kaleh isaga gudihis bu gelayo ka adag yahai hadi isskaélinayo in lugumarido iyaga dahdodha ďulka. Wahan bad taghan, ki ďulka luguridey muhu yeli kara? Mid kasta ba Nimad-weyn wajigis âd ufirsado nabaryodi iyo jeraha alamaddodha hadalkaiga marag sahalan kufuraya. Wahan maghley inu mar oďehin doney (owahas wa dagalki dahdis) "noloshi sidi owihi sugnintaidha leh walanakagoiyey". Tuguggas adag sidé obadan wey yelen in Daoud utaheyey obaroraneyey oâduoieyey! Haďdana Heman iyo Hezekiah wa ahayen kuwi Suldanka meshis wakhtigodha kaharabinayen âd ughabsadey inay dadal issutâgan kolkey dadkan dagal ukuimaden; sas wayye ohaul badan oadag âlamadedha dushodha gartey. Petro gor wahu doneyey inu isskaégo sidé wahu

yeli karo, wa in dad ah rasuladda ki uguweyn aha magaa ubihinayan, isaga sidi sedahadan kaadkâden in geber weîdsan ukabaghey.

Haddana suldankodha gorti wa uyeran wa degaisanaya mel okamaghli kari karo gor kasta, gor lagaadkàdo iyaga usaga hadi yeli karo inu kalmayo bu udow yahai. Hajadis sidas olodigey :— Sefti ki kudagalamo ama baghafki ama áradubki ama mario kuharabin jiri wahba tari mayan. Sulub sidi aus engegen bu umalaya, nahas sidi ged oghudumey. Faladdi ma yeli karo inu kabagho, dagah owadafleh aus hididkis isaga hortis bu noghoda. Aradub lugurid' aus hididkis walomaleya, baghaf hadi lalulo wa kughosola. Sidè halkan nin yeli kara? Rnn wayye hadi nin gor kasta uheli karo faraskas ohajaddis kitabki Ayub lugudigey farsamo iyo gesinimo ulehyahai inu ufulo wihi laamáni karo bu yeli laha. Sababti faraskas ghortis onkod wa loguntisey ; sidi ayah oabsileh maaha; sankis lagabagha. Bohol amuddedha ghobka kudufta; hoghis bukufaraha; ollka kolku arko kahortaga. Baghdin wa kaghosola ma absado sefta kamanoghodo. Ghaboyai falladdis isskugaraa baghafkina odalalaya gashanki. Dadúnah oadaisan sidi dulka ulugho; tarumbeta sonoghodah logudufto inu odkedha isaga ma rumaisan. Tarumbetayashi "Ha, ha" udananaya; dagalki iyo sefjidyashi sadghantodha iyo ghail' odan mel fog bu kaursada.

Ilowse adiga iyo aniga olug an kusoono weliga yenan rabin innu adow isshorimadno, yenan fànin, kolkey an maghalno dad kaleh olagaadkadey, sidi dad kuwi kafian yeli kara, yenan issfàlin sujadnimaddaini sababti dad osidas ayyelayan iminti labejeyey, iyaga gor ugubadan neftodha âd waloguribay. Arag Petro ohorti ban ushegey meshan. Ad issfàniney ; sidas okibri ghulbigis issushegey inu isaga dad odan kafian Ebbihis daraddis uadkanayo; ilowse ya sidi okaleh isaga kuwan wa hogayen sidè

àd bey jidkis udiden dulki uguriden. Kolkeyno maghalno in dad malkodha walokahadey jidki Suldanka dahdis inainu laba yelno wa lehnahai. Ki hore gorti safarno dar oluguharbinayo bainu ghobno, gashanna ainu ghadano yainan waiyin ; sababti ki Leviathan nibiriga sidi ohog ugaraeyey mauéri karin owahas bu wai ; sababti wahas hadainan ghobin, wahba innaga absin mayo. Sababtas Ki farsamo leh wahu yiri :— Wah odan korrkodha gashan imanah soghado ! Kas dahdis bad demin kartan ki hunah aradubyashis odabah odan. Haddana wafaia inan barino Suldanku ha nasiyo dad hubleh inay noraan, Isaga haaino rao neftis. Kan dahdis Daoud Bohoshi magais "Dimashadi Hoskedha" dahdedha wakufarahey; Mousa inu kudinto meshi ujogey iney kafian tahai bu arkey in san keliah usoodo oIlahi ulajogi waio. Walalkai o ! hadi Usagu norai dono mahaina lazim kabaghno hadi toban kun gor toban kun ooll innaka hor yimadan ? Ilowse Usagu laan kuwi oamar weineh kalmanayan dadki ladiley hostodha bey kudaayan.

Aniga naftaidha wàgi hore dagal ban jogey ; anigase osidi aragtey weli wa nol ahai Ki ugufian nimaddis dahdedha, wah gesinimo ah ma fani karo. Run way farhan ban ahan dona, hadan dagayashi okaleh weligai ma arkin, ilowse wa baghaya inainu khatarki odan weli kamaainan behin. Sababtisse dib iyo libah weli imalughin wahan firinaya Ilahi Filistiyashi an gudnain innaga kasobihin dono. Dambeygas Kristan bu hesey, wahu yiri :— Iman-yer oadiga miskin ! Mia tugada dahdodha kudaatey ? Wah owadatey mia lagaghadey ? Id kasta oaminaysa halkis hususo, iman kabadan hel ! Gortas ba toban kun kaadkaneysan ; hadeyan sidatan ahain saddeh keliah dib ba kaadkaneysan.

Bes wayye wa kahortegen, Oghonlaanna wa raey. Wa aysooden inti mel garen ojid hortodha kuarken,

kusodaey jidkodha; jidkas bey arken inu tosan yahai sidas kaleh jidki wajib ah iney raan. Meshasna maey garan oisslatashadin;— Hadainu kan ama kas ghadan lahain, sababti labadaba hortaini wa tosan yihin sidi noarkaino. Halkas ba isstâgen otashaden. Iminki sidas ayshaurayen, eg! ninko odar âdleh ghobey waudowadey wauwarsadey:— Maha meshan ujogtan? Wey jawaben :— Ban usoodna inti Samada Beledkedha, ilowse labadan jid ke jidkaiaga garan maainu. Wahu yiri:— Iraa, meshas an tegeya. Way raen jidkas ojidki Suldanka laha haddo kudaey. Jidkasse mar walba lalehaneyey nimanki beledki tegidis bey jeladen sidi kafogiyey, wah yer odambey wajigodha beledki walagajediyey. Ha ahato ninkas bey raen. Hadd-ose inte ayan garan labadodha ba wa uwatey mel shabakah bu geyyey, sidi âd bu ughobtey wah ayyelayan bey garan waien. Gortas maradi adeid ninkas ughobey dabbarkis wa kadatey. Kolkas halkodha bey garten. Haggas bey dulka jifen ooiyeyen sababti shabagi naftodha bey kabihi waien. Iminkasna Kristan wehelkis ba kuyiri:- Haddan ban isskuarka gefah. Ma holorayashi wahey neyirahden:-"Kuwi khayakhayainayan isskaoghada"? Wahasna oKi higmad badanay shegey manta oinnaga wa garanney:- "Ninki jiran-kis khayakhayainaya shabaka wa digaya inu lugtis ughobto." Ki-firso-fian-buha:— Haddana khat akhbar kafian ah bey nosiyyen inan jidki helno; ilowse haddan wa hilmamney inan akhrino dahdis oisskamaainan daurin ki hallawaya jidkis. Wahanna Daoud aghligis aghligaina kabadan bu laha. Sababti wa yiri:— Akhbar wihi bina Adan ay yelayan, war oafKaga dahdis ban ki hallawaya jidkis isskagadaurey. Sidas bey halkodha shabagi dahdis utâhayen. Khatimadis bey arken Mid odalalayey wa uyimi. Isagana jedal hadig yer leh gaantis askawatey. Hadi astegey meshi kujiren wa warsadey:— Inte katimiden? Maha subineysan meshan? Wahay kuyirahden:— Annagu niman miskineh Beled Sahyoun ohajjinaina. Wa nagadumi-

ey ninko maro ad leh, wahu neyiri "Iraa, aniga ba haddana meshas usooda." Ki jedal watey wahu yiri:— Ninkas kuwi khayakhayainayan midkodha rusul beinah midab kaleh issuroga sidi malaika onur eh. Gortas shabagada wa jehjehey labada nin wa ubihiyey wahu yiri:- Iraa oaniga idintuso jidkini gor labad. Wa ugeyyey dib jidki dahdis ohore eydafen gortas Ki khayakhayaineyey ayraen. Gortas wa uwarsadey:—

Halé haggé sehaten? Wahey yirahden:— Bannu seheney holorayaddi aghalkodha oBurtu Fianeh korkedha. Wa uwarsadey:— Holorayaddas mianeh idinsinin khat oki akhbar jidki leh? Wujawaben:— wanosiyen. Wahu kuyiri:— Ilowse gorti oissumalainaisen, ma lasobihisen khatkini oakhrisaten? Wa jiwaben:— Mayya. Wa warsadey:— Mahu? Way jiwaben:— Ban helmamney. Haddana wa warsadey:— Holorayaddi mianay idinwânen "Isskadaura Ki khayakhayainaya"? Wa warsaden:— Ha! Shaurkas wa nosiyen; ilowse âd maanan modhin inu ninkas ohadal fian uyahai inu ahado isaga. Wahan arkey rihyodedha inu amr kuyiri:— Alosha kusehada. Sidas bey yelen oisaga sidaran bu jedalka ugugaraey jidki fian ki wajibkodha inay kusoodan inu baro. Gorti bugaraey wahasyiri:— Aniga dad walba wa jeelahai hadal iyo jedal ban kutababaraya; bes idinka dadala tobadkena! Wahas uyeley owahu yiri:— Isskakaa idinka, wihi kaleh ahayan oholorayaddi idinamrien âd uilalia! Iyaga wa ushukuriyen ihsankis sidas obadan sababtis, jidki run hasil bey uraen wa hesen:—

Wah yer gadashedha wahay arken nin omel dher gor walba jidki Suldanka dahdis hasil okeligis usoodey bu lakulmey. Kristan wehelkis wahu kuyiri:— Haggas nin ba dushis beledki Sahyoun ujediya, wanalakulma.

Ki-firso-fian-buha:— Wa an arka. Hadda an isskaoganno; shô isaga haddana kuwi wa khayakhayainayan midkodha. Ninkas ba gor walba usodowanayey akhirkis wala-

kulmey. Magaisna wayye "Ki Ilahi-an-rumaisan." Wa uwarsadey:— Haggé usootan? Kristan:— Wahan usoonna Burti Sahyoun: Ki Ilahi-an-rumaisan sidaran bu ughosoley. Kristan:— Mahad kughosoleysa? Ki-Ilahi-a.-r. :— Wahan ughosoley sida idinka âd doghon tihin, sidas ousafareysan, otaabkini wahba makuheleysan safarkini mahène. Kristan:— Maha ba umalaineysa inan naladoweynin? Ki--Ilahi-a.-r. : — "ladowain"? mesha sidas ah oawawijini leh duniada odan malaha. Kristan: — Ilowse duniadda jiri dona walehdhahai. Ki-Ilahi-a.-r. : — Iminki dulkaiga an jogey war sidi warkini wa maghley. Wahan usobahey warkas daraddis inan arko. Wan doneyey illa hadda labaton senad beledkas ilowse berigan isskumid berigi safarkaigi bilowgis dalilahis wah maan arkin. Kristan:— Annagu mel osidas ah wa maghalney haddana wa amineyna in laheli karo. Ki-Ilahi-an-rumaisan: — Hadanan aminin hagga dulkaiga so maan safaren inti meshan an kasogarey; ilowse beledkas maan arkin (anigana wa heli laha hadu jiro, sababti ban safarey mel idinka kafog) haddan ba isskanoghonaya waisskaghobobeya wah odan gortas ankuridey wakhtigi an firsadey inan ghobto wihi haddan arkey inaney jirin. Kristan wahu kuyiri Ki-firso-fian-buha wehelkis: — Ninkan ma run bu shegey? Ki f.f.b. :— Isskaogho! Isaga wayye kuwi khayakhayainayan midkodha. Hususo wihi wakhtigi hore inna garey marko sababti dad osidi ninkan ahayen akhbalney. Mianu ma jirin Burti Sahyoun? Buroha ghurohleh korkodha makuaragney Beledki iriddis? Haddana ma wajib ba inainu kusoonno iman? Hore an usoonno ki jedal wata inusan inasogarin gor kaleh. Hadalki ibari lahaid aniga degtadha ban kuhususinaya "daf wilkaiga inad maghleyso wihi lugubarayo oilmigi run ah jidkis kaambinaya." ¡Wan ku-lehyahai walalkai o! isskadaf yanan maghlin ninkas, oiman an yelno innainu naftainna fakiskainu an helno. Kristan:— Walal o! Aniga wahan makuwarsin sababti

naftaidha wah wiswas leh ilowse wan doneyey inan kabujio adiga owah sidi miro ghulbigaga runtis wakadoneyey. Wan aghan ninkan in ilahi duniadan bu hirey indahis. Adiga iyo aniga hore antegno oinnagu wa oghnahai in imankaina Runta lugudaley 'wahba' beinah Runtalugumadaley. Kifirso fian buha:—Haddan farhaya sababtis wan firsanaya in Ilahi amantis anarko. Ninkas ba sas wa dafen, isagana wa isskategey wa ghosoleyey. Ruyohdaiga wahan kuarkey hor ayusafaren inti dul hebel hawadis sidi ainkedha gof walba omartiah ogarey lulo usodowatey. Haggan Ki-firso-fian-buha ajis bu noghonayey, lulo badan uhaieysey. Isaga ba Kristan kuyiri:— Haddan wa bilabey sidi wah ajis ah odib ban arkey an indaha kusojedo. Dulki meshan an jifno gor hurdo an helno. Kristan wehelkis wahu kuyiri:— Ma uwanaksan ah; sababti hadi an seheno hurdo, shô ma kei karno. Ki f.f.b.:— Walalki! maha kudideysa? Hurdu wa maan tahai hadi nin taab ghobto. Hadian hurdo yer ainhelno wainaka kaghobobeya. Kristan :— Ma hususinevsa kuwi holorayaddi midko innoshegey— "Isskaêga Dulki gêdagoiyo-leh"? Maanhis an isskaegno inan seheno hurdo; sababtas ansehenin hurdo sidi dadki kaleh, ilowse issilalino wah kasta khias an yelno. Ki f.f.b:-Wa an akhbaley inan wah gefey; ohadan keligaiga aha khatar wayye inan gêri geli laha hurdu sababtedha. Wan arkey wahas inu runta ah Ninki-Higmad-leh hadalkis :— "Ninko laba nin karon yihin." Gor odan an isslajirney oadiga wehelkaiga, naharis ban kaheley, adigana abâlgud fian taabkaga adkuheleysa. Kristan :— Innagu ba lulada inan didno wah fian isskushegno. Ki f. f. b. :— Ghulbigaiga odan ban akhbaley. Kristan :— Haggé kabilabeyna? Ki f. f. b. :— Meshi Ilahi yelnintis halkaini wa bilabey. Ilowse ban kubariey — bilow adiga! Kristan :— Horté hestan ankuhesaya :— Kuwi Kristo leh kolkey lulo idinhesho, udowada odegaisada kuwan

safarki-leh wah isskulahadalayen. Idinbareyan jid oyeli kartan sidé ishini lulo ohurdo in lodidaya. Kuwi iman leh hadi fian isswehshadan waissilalin karan oJehannum iney hurdan mughunnin dona. Hestas gadashedha wahu bilabey oyiri :— Aniga sual ban kuwarsanaya. Maha ghulbigadha geley owahan fikrineysey inad yeleyso sidi adyeleysa? Ki f. f. b. :— Ma rabta in adiwarsato :— "sidé adubilabtey inad ruhaga faidisilalineyso"? Kristan :— Ha! sidas wayye maanahaiga. Ki f. f. b. :— Gor badan ban issfarhinayey wihi sukhdaini agtedha luguarkey, haggasna luguîbiey; wahasse hadda ghulbi ban arka inay âd ihallai idumi lahaien hadan kujiro dahdodha. Kristan :— Mahé yihin? Ki f. f. b. :— Wah damantis othaman leh duniadan iyo malkedha. Haddana âd ban jeladey in laweraro, laisskudufto, laisskusakhrano, ahdi ma fian ah in hadal lagelio, bein lashego, wah wasmokh, ayan Sabati amrigis in lagajibiyo owihi nemnad walba dadka ruhis bu hallawaya. Ilowse akhirnimadi ban arkey owakhtig' an maghley ofirsadey wihi Ilahi lehyahai wahasna aniga kamaghley adiga iyo ninkas Ki-iman-leh olajel aha oladiley imankis iyo soodkis fian Sukhdi-obatileh dahdedha in wahas akhirkodha gêri dimashe wayye; wahasna sababtodha Ilahi ilkis kuwi rer asi ah korkodha kusodegayo. Kristan :— Markibana wahan ghulbigi lasasabey adiga ma isskahosaisisey? Ki f. f. b. : — Maan rabin inan garto markiba dembi humantis iyo hukunki ohalaya nin dembi yeley, ilowse hor iyo hore absi inisogeleysey hadalki Ilahi sababtis âd ban ujeribey indahaiga an hiro inanan arkin hadalkas nurkis. Kristan :— Ilowse maha sabab adiga isskaêlisey wihi hor iyo horan bu yeleyey korkadha Ruh Ghudus ah Ilahi? Ki f. f. b. :—Sababti ti hore—wahan an garanin in wihi korkaiga layeley Ilahi wa yeley. Wahba maan umaleyin in Ilahi nin utosinayo inu dembi arko osidas

jidki run ah bu unoghonayo. Sababti ti labad—dembi damaa korkaiga weli kafarhinayey anigana wahba inan dafo donimin. Sababti ti sadehad —maan arkin sidé an ugatago wehelodaidha kuwi hore, sidas ban jeladey hadi isslajogney iyo wihi ayyelayen. Sababti ti afrad — sidi taab iyo baghnin hanunah igeley oaniga gor gor leisasabey, inan husus to kelieh maan ghadi karin ghulbigaiga korkis. Kristan:—Wa sidi laarkey taabkaga in gor hilmami kartey. Ki f. f. b.;— Ha! run wayye, ilowse afkarkas muhtad ghulbi kusonoghodo. Wakhtigasna taab sidi hore okabadan ban laha. Kristan:— Maha ba wayye dembiyalkaga kuhususiyey gor kaleh? Ki f. f. b.:— Wah badan osidan ah, ki hore, ban hususadey hadan nin wanaksan jidki an kuarkey; ama ki labad, hadan Kitabki Ghudusah hadalkis olaakhriey ban kamaghley; ama ki sadehad, hadi madahaiga hanunsan bu noghodey; ama ki afrad, hadi laishegey deriskaiga intodha iney jiran ahadan; ama ki shanad, hadan korr ki keniseh leh alamaddis kumaghley dad gharkodha wa dinten; amakilehad, hadan hususadey inan naftedha wa dimanayo; ama ki todobad, hadi an umaghley dad kaleh ghaflad udinten; ki sidedad, gor ba âd husustey ohalkaiga wa modhey inan naftaidha dukso hukunka iman dono. Kristan:— Kolkeyna jidko jididkan adiga halkaiga hujadleh kuhususineysey gorma haulyari isskadafi karta? Ki f. f. b.:— Wah bu maaha ma yeli karo aniga. Ghulbigaiga ba ohujadleh fikiryalkas gortas âd hog ighobten ogortas hadi jidki dembi an kunoghodo fikir kelieh ban heley (inanse kunoghodo aniga ma rabin), laba gor hanun ban kudibtadey.

Kristan:— Mahana subineysey meshas? Ki f.f.b.:— Wan umaleyey — Wajib wayye inan subiyo fian soodkaiga; hadanan, waleihukuminaya shaki maleh. Kristan:—Soodna subiskis inu kafian noghodo ma haul yeshey? Ki f.f.b.:— Ha! wan kategey obaghdey dembiyalki naftaidha kelieh maaha baddanase nimanki

wahad̲ ah oh̲un; kawaïd dinti ban ghobtey, odah̲dodha sidas wayye wan tukey wan akhriey wan oiey dembi sababtis, run ban shegey kuwi deris eh dah̲dodha; wah̲ sidas okaleh ban yeley sidi obadan ďamantodha meshan ma shegi karo. Kristan :— Gortasna ma modatey h̲alkaga fia̲n ? Ki f. f. b. :— Sidas wayye gor yer, ilowse akhirkedha ta̲abkaiga gor kaleh korkaiga bu kuda̲ey. A̲malkaiga osidi fia̲n walaďisey ďamantis ma tosan karin. Kristan :— Dibkan sidé uheshey oa̲malkaga fia̲n walaďisey ? Ki f. f. b. :— Wah̲ badan sababtodha ďibkan ban heley wih̲i kaleh oâd ban heley hadala dah̲dodha ainkan :— "Wih̲i h̲aghaina eh oďan sidi ďar uskug leh" — iyo "Ninna lama hesabo si h̲aghagsan sharia̲ a̲malkis sababtis" — iyo "Kolkad wah̲as oďan ad yeshen daha, 'Innagu kuwi adegayan wah̲ ba ma tarayan' " —iyo sidetan wah̲ badan okaleh. Wah̲an daraddodha isskuh̲ubsan sidi isogeliyey :— Hadi wih̲i h̲agh naftaidha ah ďamantodha ďar uskugleh, hadi nin sharia̲ a̲malkis sababtis si haghagsan lohesab mayo, hadina wah̲ba ma tarno kolkain wih̲i oďan âd yelney, ninkan doghon wayye ki umalaynaya in Samada sharia̲d lagaheli karo. Haďdana sidan ban umalayey :— Hadi nin laba kun shilling oghamaisan yahai, wah̲as kadambey wah̲ oďan okasoîbsado dukanka wausinayey, hadi dukanka daftarkis h̲isab ti hore anlatirin dukankas wa astakain kara h̲abas wa kuhiri kara illa ghanti ubih̲iyo. Kristan :— Ninkasna ba h̲alkis iyo h̲alkaga sidé isskuêgtay ? Ki f. f. b. :— Wah̲an umaleyay ghulbigaiga :— Wih̲i odembi an lahai Ilahi kitabkis ghan dher wayye ohadan haďdan jidkaiga sifia̲n ugusoodo wah̲as dah̲dis ghantas lamabih̲in karo. Sababtas ban ughusi laha ohadi haďdan wah̲as oďan isswanajinaya. Sidése leigabih̲in kara h̲ukunkas oinan helo khatar bu aha wih̲i dembigaiga hore dah̲dodha ?

Kristan :- Sifia̲n issuegtay, ilowse wa an kubariey,

hadalkaga hor igusheg! Ki f. f. b.:- Wah kaleh weli wa iweireiriyey gortas kadambey oaniga soodkaiga beri dowed sidatan wa wanaksaney, wahan iweireiriyey inan hadan wihi ugufian ohaddan yeloya âd uego wahan arko dembi oûsub wihi ugufian isskughaladan. Sababtas lazim anisskughiro, oaniga sidi issfâninayey neftaidha oinan sidi wihi wajib ah an yeley, berigo wihi dembi ah ban yeley Jehannum wa igein kara ohadi noloshaida hore gef laan laha. Kristan:- Mahadna ban yeshey iminkas? Ki f.f.b. :- "Mahad yeshey?" mia itiri? Wahan yelo ban garan waiey tan iyo intan isskaaragney anigaiyo Ki-iman-buha (=Ki-dar-ghoba) wihi halkaiga ah banushegey. Sababti isaga iyo aniga wadey ban ahain. Wahu iyiri:— Hadanad helin ninko odembi an lahain haghhis hagh malihid, haghgaga ma anfayo iyo hagh dadki odan duniadda ah maanfayo in adiga salamad kudigto. Kristan:- Miad umaleysey in runta bu yiri? Ki f.f.b. :- Hadi isaga sidas ishego gorti aniga jeelan iyo raha uarkey inan naftaidha soodkaiga karon subinayey ban ushegi laha:- Adiga wa doghon. Sidas ban abâlka kusin laha. Haddanse iminki ban ogahai dhaifkaiga iyo dembi issghobsada wihi ougufian ban yelaya, wahan lahabai inan akhbalo inu run shegey. Kristan:- Ilowse kolkey fikrikan ukugeliyey ohoré, mia umaleysey inu laarki karo nin ainadas hagh lashegi kara korkis inusan dembi yelin. Ki f.f.b.:- Lazim wan ghiraya in warkas iganehayey marki hore an maghley; ilowse kolkan wah saidah an ulahadley anigana iyo isaga issheshinney, gortas ban kuâminey odan ghulbigaiga. Kristan:- Bal ma kuwarsatey akhbarti ninkas siděna adiga isaga dahdis hagh ughobsan lahaid? Ki f.f.b :- Ha! Wan warsadey wa iyiri:- Sayyidi Yesu wayye ojira Ki ugukoreya gaantis omidigta. Sidasna Isaga dahdis hagh ba ughobson lahaid olaaminey wihi uyeley Isaga keligis kolku ayanta jid laha, wihina ogedki saleeb

ah korkis gêri kuhânusadey. Haddana wahan warsadey :- Ninkas haghhis sidé sidu yeli karo in nin kaleh hagh leh Ilahi hortis ujogo? Wahu iyiri :- Usagu naftis Ilahi wayye ohogleh, wihina wahu yeley wahas uyeley haddana gêri bu kudintey wa dintey daraddis naftis maaha, wa daraddaidha; owihi bu yeley iyo istahilkodha sidi oana hagagsan dahdodha ayhesabi doneyo, hadan amino korkisa. Kristan :- Gortas maha yeshey? Ki f.f.b.:- Wa an issweirerey odidey inanan aminin osidi sababti inan umaleyey inu Isaga salamad ibihinayo ma uakbalin. Kristan :- Mahana Ki-iman-buha bu kuyiri gortas? Ki f.f.b. :- Wa iyiri Isaga uteg! wa arkeysa. Wahan iri :- Wahas inan yelo wa amr weyn. Wahu yiri :- Sidas maaha; sababti walaguyereya. Gortas isiyey kitabko, war lugudigey Yesu ulaha, inu faraj igelo hadal "kâle" ah inan akhbalo. Warki kitabkas waha yiri in haraf walba oâdyer ah iyo dibbiadis walba wa ka adag yahai irku iyo dulka. Wahan warsadey :- Mahan lazim yeleya kolkan kuimado. Wahu iyiri :- Jilbaha ujogso oghulbigaga iyo naftadha odan Abbaha ubari hakuisharo Usaga. Haddana wan uwarsadey :- Sidé lazim utuga? Wahu yiri :- Tag, uarkeysa gambar rahmad leh korkis beri walba senad bukufadiya inu kuwi uyimadan samah iyo afid usiyo. Wahan kuiri :- Maan oghi wahan ushego kolkan kuimanayo. Wahasna inan idahdo bu iyiri :- Ilahi hainaharisto aniga kan odembi leh, haiyelo Yesu Kristo inan ogahado oiman dahdis an helo, sababti ban arka hadan haghgisa jirin ama aniga iman malihi haghgas dahdis âu ban leidumey. Rabbigaiga o! wahan maghley inad Adiga wa Ilahi rahmad leh; Wilkagana Yesu Kristo inu fikiyo duniada odan kadigtey; Haddana inad rali tahai Usaga uisiyo osidi miskin dembileh an ahai. Sababtas Rabbi o! gortan onefis lehdahai nimadadha weini osalamad naftaidha ubihi! dahdi Wilkaga Yesu Kristo, Amin. Kristan :- Adiga ba ma

yeshey sidi luguyiri ? Ki f.f.b. :- Ha ! gor badan ban yeley. Kristan :- Abbaha Wilkisa ma ku tusey ? Ki f.f.b. :- Kas maaha gorti horé, ti labad, ti sedahad, ti afrad, ti shanad, haddana ti lehad maaha.

Kristan :- Kolkas maha yeleysey ? Ki f.f.b. :- Maha ban yeley ? Wah an yeli laha fikrkedha ma an lahain. Kristan :- Fikiryal mian kusasabin "Tukasho isskadaf ?" Ki f.f.b. :- Ha ! Boghol iyo boghol gor bu isasaben. Kristan :- Maha inad isskadafo weiddey ? Ki f.f.b. :- Wahan aminey wahas run leishegey oKristo kan haghgis mahé duniadda odan ma ifaki karey sababtasna sidi wan modhey hadan isskadafo wa dimanaya hadanse gambarki rahmad leh hortis an sugo, gêri keliged ban udimanayo. Haddana hadalkan ghulbigaiga wa geley :- Hadi wihi ragan, usug ! sababti haghighan wa imanaya oma ragi dono. Sidas wayye situkadey tan iyo inta Abbaha Wilkis itusey. Kristan :- Bal sidé lakugutusey Usaga ?

Ki-f.-f.-b. :—Indaha korkaiga ku ma an arkin, ilowse indaha aghligaiga ; sidas ban uarkey. Berige aniga âd-ughulubsan ah, wan umalaya inan kasighulubsan aha gor kasta noloshaida ti hore ; wahan sababtis gor usub ban arkey dembigaiga odan sidé uwaweyn yihin, sidé uwahun yihin. Gortas oJehanname keliged mahé onaf-taida had iyo gor dib ba luguâdabeya wah ba ma sugneyey, Sayyidna Jesus, sidan umaleyey ghaflad ban kuarkey, wahu iyiri :— Sayyidu Jesus Kristo dahdis amino walaga salamad bihineya adiga. Ilowse wahan ujawabey :—Sayyid'O ! aniga âd ban udembi badan ahai. Wahu ijawabey : — Nimadaida wakukafa-ineysa. Wahan iri :—Sayyidi, imanku mahu yahai ? Kolkas ban arkey in itusey hadalkan :—"Ki iimada ab-adan gâjon mavo kina dahdaida amina ebedkis maomayo. "Wahu itusey imashaddi iyo imanti iney is-skumid yihin, oinu ki imada owahas ki ghulbigi iyo

jeelan ror kudoneya Kristo fikintis, isaga ba Kristo dahdis amino. Iminkas indahaiga ilma igusodadey, wahan warsadey haddana: — Sayyid'O! mia sidi oaniga dembi badan leh ma run ba Adiga haggaga laakhbali kara sidasna Adiga daraddada fikin ma heli kara? Wahan maghley inu yiri:—"Usagana ki iimada ebedkis bananka ban umaturayo." Wahan iri:—Ilowse Sayyid, sidé ban lazim kuega gortan kuimanayo oin imankaiga hagh dahdadha lugudigo? Wahu yiri: — "Jesus Kristo duniadda wa sogaley inu wihi dadah odembileh ufikiyo." "Usagu dahdis shariadda odan wa ladameyey nin walba oaminey haghnimaddi sababtedha." "Dembiyashaina daraddedha bu udintey, haghaina daraddedha dimasho bu ugasonoladey." "Usaga innaga innajeeley, dembiyashaini odan diggi Naftis bu innakumariey. Usaga weligis nolanaya inu daraddaina utukado. Wahas odan dahdodha ban gartey inan lazim kuego in hagh an helo Usaga Naftisa dahdis dembiyashaidha gaantaha lagabihiyo diggis dahdis: wihi oshariaddi Abbihis ulaha udega-nugladey hakunkedha bu akhbaley inu yeley Naftis daraddis maaha ilowse isaga daraddis ki tan iyo fikintis akhbalaya oshukr noghaya. Gortas ghulbigaiga farhad bakabuhsantey, indahaiga ilmo kabuhsantey, jeelanti naftedha kor kasoshubmatey Jesus Kristo magais iyo dadkis iyo amalkis (jididkis) darradodha. Kristan:—Wahan, run wayye, Kristo aragnimaddis ghulbigadha latusey. Ilowse isheg in kasta aragnimaddas ah maha naftadha dahdedha eyyeshey? Ki f. f. b.:—Wey yeshey inan arko duniadda odan ohaghedha odan hukum hallaisan bey lehdahai. Wey yeshey inan arko in Ilahi Ki Ebbaha ah wa Usagu hagh leh ohaghagsan hagh uyeli kara kidembi leh ouimanaya. Wey yeshey inan arko hishod badan sababti noloshedha hore humantedha. inanna naho sababti oghon laantedha ti hore. Sababti wâgi hore tan iyo

haddan fikir ghulbigaiga weli ma gelin sidé leitusey Jesus Kristo ghurohdis. Wey yeshey ina jeelado nolol ghudusah oragsan inan Sayyid Jesus mamuskis iyo amantis sababtodha wah ba an yelo. Fikirkan ba itabadey—"hadian iminkan kun wadan odigah korkaiga an lehado, kas damantis Sayyid Jesus darraddis ban ushubi kari laha.

Kolkas wahan arkey ruhyodaidha dahdedha in Ki-f.-f.-b. gadal buêgey wahu arkey Oghon — laan ki gadal udafen ogadashodha sosoodey. Kristan bu kuyiri :— Eg! Inanka dalinta yer sidé mel fog gadal ososooda. Kristan :—Ad ban uarka. Inan lasoodo ma urabo. Ki-f.-f.-b. :—Wahanse umalaynaya in wahba kamahumaden hadu yelo in nolasoodo. Kristan :— Run wayye, ilowse hadalkan igarumaiso in usaga wah kaleh bu eganaya. Ki-f.-f.-b.:—Sidasna ban umalaynaya; ilowse ainusugno! Wey yelen sidas. Kristan wahu uyiri :-Wariya! Sokale! Maha sidan gadal uguragte Oghonla :— Wahan keligai inan soodo dad kaleh inan lasoodo âd kajeel ahai, hadi dadkas iney kafian yihin umalain mayo. Kristan gortas kuyiri Ki-firso - fian - buha, ilowse hos bukuhadaley :—Mianan kushegin inusan donin kor antegno inanu inananlasoodin, ilowse hadi wayye kor antegno omeshan idla iminkan isslahadalno.

Gortas wajigis ujediyey, Oghonlaan oyiri :—Wariya, Sidé tahai? Sidé Ilahi iyo naftadha issulajirin? Oghonla :—Wan filinaya inu halkaiga fian yahai sababti gor walba damaayashi fianai ban kabuhsam osoodkaiga dahdis ghulbigaiga dahdis wa gelayan ofaraj isinayan. Kristan :—Damaayashas yé yihin? ban kutuga, nosheg'! Oghonla :—"Damaayashas yé yihin" miad tiri? Ilahi iyo Samada kufikriya. Kristan :—Sheydanyashi sidas ayyel-

an iyo niman ruhodha oluguhukume âdabti. Oghonla :—Anigase kuwas korkodha wa ufikiraya, haddana inan helo âd baraba. Kristan :—Dad badan osidas ayyelayan kuwi umayan ekin iney sogarayan; "Ki agis ah wa raba, wah ba heli mayo. Oghonla :—Anigase wa fikiraya owah kaleh odan wa dafey inan helayo. Kristan :—Wahas maan rumaisan karo, wah odan dafidedha amr ûlus wayye. Dad badan ma yaghan amrgas sidi ûlus yahai. Ilowse mahu osidé kurumaisatey wah odan inad daftey Ilahi daraddis oSamadda daraddedha? Oghonla :—Ghulbigaiga sidas ishegaya. Kristan :—Ninki higmadleh wayiri :—Ki ghulbigis rumaisada wa nin doghon way. Oghonla :—Wahas layiri waghulbi hunleh warkis, ilowse ghulbigaigi wa fian yahai. Kristan :—Ilowse kan maha obeyyan ah? Oghonla :—Ghulbigaiga waifarajinaya inan Samadda an garo. Kristan :—Khiyanaddi ghulbiga wahas kugusasabi kara; manahis nin ghulbigis faraj owihi sugnin ah kugeli kara inu heli dono wah korkis sugnin dul-dig maleh. Oghonla :—Ilowse noloshaidha waissegyihin oghulbigaiga; sababtas sugnintaidha sugnin dul-digah wayye. Kristan :—Ya kuyiri noloshadha iyo ghulbigaga inay issogyihin? Oghonla :—Ghulbigaiga warkan iyiri. Kristan :—Hadalkaga sidi mahmadan wayye—"Wehelki naftaidha usoweidi aniga inan tug ahai!" Mia kutiri—"Ghulbigaiga warkan iyiri"? Hadi marag hadalki Ilahi amrkan dahdis ukaayo mahé, marag kaleh wah tari mayo. Oghonla :—Ilowse ghulbigas ofikr fian watusa, mianu ghulbi fian? Soodkasna owasiaddi Ilahi issraaya, mianu sood fian? Kristan :—Ha! Ghulbi ki fikri fian tusaya, fian wayye; soodna ki wasiaddi Ilahi issraaya, fian wayye. Ilowse wahas olabad in laghobo iyo in lomalaya ghobashadedha âd bey ukalaain. Oghonla :—Wan tugaya, isheg!

